DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

XAFIISKA XISAABIYAHA GUUD EE DAWLADDA

WARBIXIN MAALIYADEEDKA RUBACA KOOWAAD EE JANAAYO - MAARSO 2025

MAY 2025

WARBIXIN MAALIYADEEDKA

Rubaca Koowaad ee 1da Janaayo – 31da Maarso 2025

Waxaa soo saaray warbixintaan

XAFIISKA XISAABIYAHA GUUD EE DAWLADDA

WAXAAD KA HELI KARTAA WARBIXINTAAN BOGGA XAFIISKA XISAABIYAHA GUUD

www.oags.gov.so

Dhismaha Wasaaradda Maaliyadda
Degmada Shangani
Mogadishu – Somalia
Email: reporting@oags.gov.so

TUSMADA WARBIXINTA

LIISKA SHAXAHA ..... **iv**

LIISKA JAANTUSYADA ..... **v**

CADDAYNTA WAAJIBAADKA **6**

FAALLO GUUD **7**

MIISAANIYADDA SANNADKA 2025 ..... **9**

DHABTA IYO MIISAANIYADDA DAKHLIGA EE SANNADKA 2025 9

DHABTA IYO MIISAANIYADDA KHARASHAADKA EE RUBACA 1aad EE SANNADKA 2025 11

ISBADALADA DAKHLIGA DAWLADDA RUBACA 1AAD, 2021-2025 ..... **14**

DAKHLIGA GUDAHA 15

DEEQAHA DIBADDA 18

Dakhliga Gudaha iyo Kharashaadka Hawlfulinta Dawladda 20

DAYMAHA DAWLADDA 2021-2025 ..... **21**

ISBADALKA DHABTA KHARASHAADKA DAWLADDA, 2021-2025 ..... **22**

Noocyada Kharashaadka 23

Muuqaalka Lacag Qabashada iyo Bixinta **35**

Muuqaalka Isbarbardhig Dhabta iyo Miisaaniyadda **36**

MACLUUMAAD GUUD IYO XEERAR XISAABEEDKA DAWLADDA **37**

FAAHFAAHINO LA XIRIIRA MUQAALADA WARBIXINTA **45**

Lifaaqa 1aad: Faahfaahinta Isticmaalka Misaaniyadda Kharashaadka Joogtada ah, Rubaca Koowaad, 2025 ..... **56**

Lifaaqa 2aad: Faahfaahinta Isticmaalka Misaaniyadda Kharashaadka Mashaariicda Rubaca 1aad 2025 ..... **73**

Lifaaqa 3aad: Isticmaalka Miisaniyadda Kharashaadka Guud ee Hay'adaha Dawladda Rubaca 1aad 2025 ..... **89**

LIISKA SHAXAHA

Shaxda 1aad: Dhabta iyo Miisaaniyadda Dakhliga Dawladda, Rubaca 1aad 2025 9
Shaxda 2aad: Faahfaahinta Deeqda ee Sannadka 2025 9
Shaxda 3aad: Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Rubaca koowaad 2025 11
Shaxda 4aad: Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Hay'adaha Dawladda 11
Shaxda 5aad: Dhabta Dakhliga ee Saddex biloodka Sannadaha 2021-2025 14
Shaxda 6aad: Dhabta Qaybaha Dakhliga Gudaha saddex biloodkii koowaad 2021-2025 15
Shaxda 7aad: Qaybaha Dakhliga Canshuraha Saddex biloodka koowaad ee 2021-2025 17
Shaxda 8aad: Dakhliyada Kale Saddex biloodkii koowaad ee sannadaha- 2021-2025 18
Shaxda 9aad: Deeqaha Dibadda, 2021-2025 18
Shaxda 10aad: Dhabta Deeqaha labo dhinacle ah ,2021-2025 19
Shaxda 11aad: Dhabta Deeqda Dhinacyada Badan, 2021-2025 19
Shaxda 12aad: Deeqaha Kabka iyo Deeqaha Mashaariicda 19
Shaxda 13aad: Dakhliga Gudaha iyo Kharashaadka Dawladda, 2021-2025 20
Shaxda 14aad: Dakhliga Gudaha Vs Mushaaraadka Shaqaalaha, 2021-2025 21
Shaxda 15aad: Daymaha Dawladda 21
Shaxda16aad: Dhabta Kharashaadka Hay'adaha,2021-2025 22
Shaxda17aad: Noocyada Kharashaadka la Bixiyey, 2021-2025 23
Shaxda 18aad: Mushaaraadka Shaqaalaha, 2021-2025 23
Shaxda 19aad: Mushaaraadka Hay'adaha Adeega Amnig iyo Hay'adaha kale 24
Shaxda 20aad: Isticmaalka Agabka iyo Adeega la bixiyey, 2021-2025 25
Shaxda 21aad: Dulsaarka Daymaha, 2021-2025 28
Shaxda 22aad: Kaalmo Dhaqaale, 2021-2025 28
Shaxda 23aad: Deeqaha la bixiyey, 2021-2025 29
Shaxda 24aad: Deeqaha la siiyo Dawlad Goboleedyada, 2021-2025 29
Shaxda 25aad: Faa'iidada Bulshada, 2021-2025 30
Shaxda 26aad: Kharashaadka Kale 30
Shaxda 27aad: Hantida aan Maaliyadda ahayn, 2021-2025 30
Shaxda 28aad: Dib u bixinta Daymaha, 2021-2025 31
Shaxda 29aad: Isticmaalka Miisaaniyadda Kharashaadka Joogtada ah ee Hay'adaha Dawladda 33
Shaxda 30aad: Isticmaalka Miisaaniyadda Kharashaadka Mashaariicda ee Hay'adaha Dawladda 34

LIISKA JAANTUSYADA

Jaantuska 1aad: Dhabta Qaybaha Dakhliga Rubaca koowaad 2025....10
Jaantuska 2aad: Kharashaadka Joogtada ee la bixiyey Rubaca koowaad 2025....12
Jaantuska 3aad: Kharashaadka Mashaariicda la bixiyey sannadka 2024....13
Jaantuska 4aad: Dakhliga Dakhliga Gudaha & Deeqaha Dibadda....14
Jaantuska 5aad: Saamiga Dakhliga Gudaha & Deeqaha Dibadda....14
Jaantuska 6aad: Saamiga Dakhliga Canshuraha & Dakhliyada Kale....15
Jaantuska 7aad: Qaybaha Dakhliga Gudaha Jan-Mar 2021-2025....15
Jaantuska 8aad: Kororka/Naaquska Dakhliga Gudaha rubaca koowaad ee 2021-2025....16
Jaantuska 9aad: Wadarta Dakhliga Gudaha rubaca koowaad ee Sannadka Gudihiisa....16
Jaantuska 10aad: Saamiga Qaybaha Dakhliga Canshuuraha....17
Jaantuska 11aad: Dakhliga Gudaha & Kharashaadka Hawlfulinta....20
Jaantuska 12aad: Kharashaadka Hay'adaha Dawladda....22
Jaantuska 13aad: Saamiga Mushaarka Hay'adaha Amniga iyo Hay'adaha kale....24
Jaantuska 14aad: Mushaarka Hay'adaha Amniga iyo Hay'adaha kale....24
Jaantuska 15aad: Kharashaadka Safarka & Shirarka....26
Jaantuska 16aad: Kharashaadka Hawlfulinta....26
Jaantuska 17aad: Kharashaadka Kirooyinka....26
Jaantuska 18aad: Kharashaadka Kale ee Hawlfulinta....27
Jaantuska 19aad: Kharashaadka hawlgalada Ciidamada....27
Jaantuska 20aad: Kharashaadka Guud ee kale....28

CADDAYNTA WAAJIBAADKA

Warbixinta maaliyadeed ee ku qoran kana bilaabata bogga 7aad kuna eg bogga 90aad waxaa loo soo diyaariyay hab waafaqsan sharciga iyo xeer nidaamiyaha Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 (PFM Act-2019). Sidoo kale, si waafaqsan Xeerarka Caalamiga ah ee Halbeegga Xisaabaadka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda, Lacagaha Caddaanka ah (Cash Basis IPSAS, 2017).

Qodobka 44aad faqradiisa 2aad ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud waxa uu farayaa "*Sarkaal Idman kasta ee hay'adaha Dawladda waa in uu warbixin saddex biloodle ah usoo gudbiyaa Xisaabiyaha Guud xisaabaadka hay'adaha Dawaldda".* Waxa sidoo kale uu qodobka 43aad faqradiisa 1aad farayaa Xisaabiyaha Guud ee Dawladda in uu wargeliyo dhammaan hay'adaha Dawladda, Dawladaha hoose iyo Shirkadaha Dawladu leedahay nidaam xisaabeedka ee laga doonayo in ay dhaqan geliyaan. Si waafaqsan qodobkaas kor ku xusan, Xisaabiyaha Guud ee Dawladda waxa uu qaatay nidaam xisaabeedyada caalamiga ah ee la isla aqoonsanyahay gaar ahaan Halbeegga Xisaabaadka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda, Lacagaha Caddaanka ah (Cash Basis IPSAS, 2017) marka uu diyaarinaayo xisaabxirka Dawladda.

Xafiiska Xisaabiyaha Guud waxa uu markasta soo diyaariyaa xisaabxirka Dawladda, isagoo ku soo bandhiga dhammaan macluumaadka iyo faahfaahinnada lagama maarmaanka u ah, fahanka caddaymaha maaliyadeed ee koobaya dhaq-dhaqaaqa maaliyadeed ee Dawladda. Haddaba, waxaan halkan ka caddaynayaa in dhammaan xisaabaadka ku qoran warbixinnada maaliyadeed ay waafaqsanyihiin xisaabaadka ku qoran buugaagta iyo diiwaanka maaliyadeed ee Dawladda.

Waxa aan sidoo kale qirayaa in xisaabxirka Dawladda Federaalka Soomaaliya saddex biloodkii koowaad sannad maaliyadeedka ku dhamaaday 31da Maarso 2025 loo soo diyaariyay si waafaqsan Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 iyo Xeer nidaamiyaha Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2022 iyo sidoo kale Halbeegga Xisaabaadka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda, Lacagaha Caddaanka ah (Cash Basis IPSAS, 2017).

.....

Abdirahman Mohamed Anas

Xisaabiyaha Guud ee Dawlada

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA XISAABIYAHA GUUD EE DOWLADDA
OFFICE OF THE ACCOUNTANT GENERAL
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

FAALLO GUUD

DULMARKA GUUD EE XISAABXIRKA

Xisaabxirkani waxaa si joogta ah loogu soo gudbiyaa hawlqabadka Dawladda ee dhinaca maaliyadda ee sannad kasta iyo sannadka gudahiisa. Sidaas darteed, warbixintani waxa ay khusaysaa hawlqabadka Dawladda rubaciisa koowaad ee ku dhammaaday 31da March 2025 sida ku cad muuqaalka dakhliga iyo kharashaadka. Sidaas si la mid ah, warbixin maaliyadeedkani waxa uu akhristaha u siinayaa fursad in uu si faahfaahsan u helo sida ay u dheceen dhammaan dhaqdhaqaaqyada maaliyadeed ay dawladdu fulisay iyo muuqaalka maaliyadeed ee Dawladda ee dhammaadka rubaca 1^{aad} sannad maaliyadeedka 2025. Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dawladda ayaa isku keenay warbixin maaliyadeedka, guud ahaan Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda kaddibna soo saaray warbixintaan.

Xisaabxirka rubaciisa 1^{aad} sannad maaliyadeedka 2025, waxaa lagu soo gudbiyey dhacdooyinka maaliyadeed ee Dawladda kuna jira miisaaniyadda guud ee Dawladda, rubaciisa 1^{aad} sannadka 2025 kaasoo horay u ansixiyeen labada aqal ee Baarlamaanka Soomaaliya. Sidaas darteed, iyada oo la eegayo qodobka 1.4.8 ee Halbeegga Xisaabaadka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda, Lacagaha Caddaanka ah (Cash Basis IPSAS, 2017), xisaabxirkani waxaa uu khuseeyaa warbixinta dakhliga iyo kharashaadkii ku jiray qiyaasta Miisaaniyadda Dawladda ee rubaca 1^{aad} sannad maaliyadeedka 2024. Sidoo kale waxa aanan ku jirin oo aan warbixintan oo lagu soo darin Dakhliga iyo kharashaadka aan ku jirin miisaaniyadda ee ay isticmaaleen Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda intii lagu guda jiray isla ruabaca 1^{aad} sannad maaliyadeedka kor ku xusan.

Guud ahaan, saadaasha miisaaniyadda iyo warbixinta dhabta dakhliga ee soo galay Dawladda iyo sidoo kale kharashaadka sida dhabta ah ugu baxay hawlaha Dawladda, waxaana loo soo bandhigay sidii ay ugu suurto galin lahayd bulshada Soomaaliyeed in ay helaan xogaha maaliyadeed ee dawladda iyo faahfaahino la xariira dakhliga dawladdu heshay iyo kharashaadkii lagu bixiyey rubacaa kowaad ee sannad maaliyadeedka 2025.

Hay'adaha Dawladda ee ku jiray qoondada Miisaaniyadda Dawladda ee laga soo diyaariyay warbixintaan ka eeg faahfaahinada hoose.

1.2 Qaabka iyo Muuqaalada ay ka Kooban tahay Xisaab Xirka

Warbixinta waxaa loo soo diyaariyay nidaam waafaqsan Halbeegga Xisaabaadka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda, Lacagaha Caddaanka ah (Cash Basis IPSAS, 2017). Guud ahaan xisaabaadka Dawladda waxaa lagu maamulay laguna saleeyey hab-xisaabeedka lacagta caddaanka ah ee faraya in la aqoonsado dhaqdhaqaaqa maaliyadeed keliya markii si dhab ah lacagta loo helo ama loo bixiyo.
Hadaba, xisaabxirkani waxaa loo soo gudbiyay sida ku cad qaybta 1^{aad} ee isla Halbeegga Xisaabaadka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda, Lacagaha Caddaanka ah (Cash Basis IPSAS, 2017), taasoo waajibinaysa in macluumaadka soo socda la shaaciyo.

Muuqaalka Lacag Qabashada iyo Lacag Bixinta

Sida uu qabo Halbeegga Xisaabaadka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda, Lacagaha Caddaanka ah (Cash Basis IPSAS, 2017) gaar ahaan faqradaha kala ah 1.3.12 iyo 1.3.13, muuqaalka dakhliga iyo kharashaadka waa in lagu soo gudbiyaa wadarta lacagaha la

qabtay (dakhliga) ee soo galay dalwadda iyo lacag bixinta (kharashaadka) Dawladda. Sidoo kale, waxaa lagu soo bandhigaa farqiga u dhexeeya lacag qabashada iyo lacag bixinta sannadka, si loo muujiyo haraaga ku soo haray (Dheeri/(Dhiman) xisaabaadka Khasnada Dawladda. Waxaa kale oo lagu soo bandhigaa ilaha dakhliga ka soo galo Dawladda iyo meelaha lagu bixiyo.

Muuqaalka Isbarbardhigga Dhabta iyo Ku talagalka Miisaaniyadda

Muuqaalkan wuxuu is barbardhigayaa kutalagalka qiyaasta dakhliga miisaaniyadda Dawladda iyo dhabta dakhliga la helay. Waxa ay iftiiminaysaa inta uu le'egyahay dakhliga soo galay Dawladda iyo sida loo bixiyey kharashaadka si waafaqsan xeerka miisaaniyadda uu ogolaaday labada aqalka ee Golaha Baarlamaanku in loo isticmaalo dakhliga Dawladda.

Kutalagalka hore (asalka) ee miisaaniyadda waxaa loola jeeda; miisaaniyadda ay labada aqal ee baarlamaanka ansixiyeen oo waxba laga badalin. **Kutalagalka danbe** waxa loola jeedaa miisaaniyadda labada aqal ansixiyeen oo lagu sameeyey kala wareejino madaxyada ama hay'adaha Dawladda miisaaniyadooda. Waxaana la is barbardhigaa kutalagalka danbe iyo dhabta dakhliga lasoo uruuriyey ama kharashka la bixiey.

Xeerarka Xisaabeed

Waa xeerarka, axdiyada, mabaadi'da, shuruucda u gaarka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya lana dhaqan galiyey intii lagu guda jiray diyaarinta iyo soo gudbinta Xisaabxirka Dawladda.

Faahfaahinno la xiriira muuqalada warbixinnadda

Faahfaahinnada la socda xisaab-xirka waxa ay ka caawinayaan akhristaha in si qoto dheer loo fahmo macluumaadka ku xusan muuqaalada ku qoran warbixinta. Sidoo kale waxa ay qayb muhiim ah ka yihiin faahfaahinada dakhliga la qabtay kharashka la bixiyey Intii lagu dhax jiray Rubacii koowaad sannad maaliyadeedka 2025.

Faahfaahino Dheeri ah

Qaybtan waxaa lagu soo bandhigaa qayb ka mid ah xeerarka xisaabeed iyo faahfaahino kale oo sharaxaad dheeri ah ka bixinaya xisaabxirka. Waxaa kale oo laga heli karaa caddaynta in la dhaqan galiyay shuruudaha ku xusan Halbeegga Xisaabaadka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda, Lacagaha Caddaanka ah (Cash Basis IPSAS, 2017).

Halkan hoose waxaa ku xusan warbixinada laga heli karo macluumaad dheeri ah oo loo baahanyahay in la faafiyo si kor loogu qaado heerka isla xisaabtanka iyo daah-furnaanta maamulka maaliyadda dawladda.

MIISAANIYADDA SANNADKA 2025

DHABTA IYO MIISAANIYADDA DAKHLIGA EE SANNADKA 2025

Faah-Faahin	Dhata Jan-Mar 2025	Miisaaniyadda Asalka	% Fulinta
Dakhliga Gudaha & Deeqaha Dibadad	**$159,021,626**	**$1,331,969,583**	**12%**
Dakhliga Gudaha	**93,890,358**	**430,341,430**	**22%**
Canshuuraha	**67,990,845**	**295,289,259**	**23%**
Canshuurta Dakhliga & Faaiidooyinka	16,123,147	38,031,213	42%
Canshuurta Adeegga & Agabka	12,286,455	56,111,497	22%
Canshuurta Ganacsiga Dibadda	37,427,276	186,211,437	20%
Canshuuraha Kale	2,153,966	14,935,112	14%
Dakhliyada Kale	**25,899,513**	**135,052,170**	**19%**
DEEQAHA DIBADDA	**65,131,268**	**901,628,154**	**7%**
Kab Miisaaniyadeed	17,408,128	169,967,500	10%
Kab Mashaariic	47,723,140	731,660,654	7%

Shaxda 1aad: Dhabta iyo Miisaaniyadda Dakhliga Dawladda, Rubaca 1aad 2025

Sida ka muuqata shaxda 1aad, waxaa la helay dakhli dhan $159M oo u dhiganta **12%** wadarta odoroska dakhliga miisaaniyad sannadeedka 2025. Dakhliga Gudaha waxaa la helay $94M oo u dhiganta **22%** miisaaniyadda sannadka 2025, halka deeqaha dibadda la helay $**65**M oo u dhiganta **7%** odoroskii deeqaha dibadda ee Miisaaniyad sannadeedka 2025.

Qaybaha Deeqaha Dibadda waxaa loo kala qaadaa kab miisaaniyadeed iyo mashaariic. Kabka Miisaaniyadda waxaa la helay sannadka 2025 deeq dhan $17.4M oo ka ah 10% miisaaniyad sannadeedka 2025, sidoo kale, kabka mashaariicda waxaa la helay dakhli dhan $47.7M una dhiganta 7% miisaaniyadda sannadka 2025.

Sida ka muuuqata shaxda 1aad wuxuu isbarbardhigayaa dhabta dakhliga ee la soo uruuriyey rubaca koowaad iyo miisaaniyad sannadeedka 2025. Qaybaha Dakhliga Canshuuraha; Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidada waxaa la helay $16M oo u dhiganta 42% odoroskii miisaniyada sannadka 2025. Canshuurta Agabka iyo Adeega ayaa la helay dakhli dhan $12M oo u dhiganta 22% miisaaniyad sannadeedka Canshuurta Agabka iyo Adeega. Canshuurta Ganacsiga Dibadda waxaa ku jirtay qiyaasta miisaaniyad sannadeedka $186M waxaana lasoo uruuriyey rubucii koowaad ee sannadka 2025 dakhli dhan $37M oo u dhiganta 20% miisaaniyadda sannadka, Canshuuraha Kale ayaa la helay $2M, waxayna ka tahay 14% miisaaniyad sannadeedka 2025.


Ciida Bixisay Deeqda	Kab Miisaaniyadeed	Kab Mashaariic	Wadarta Deeqda	% Wadarta
Dawladda Turkiga	7,500,000	-	7,500,000	11.5%
Dawladda Imaaraatka Carabta	2,787,693	-	2,787,693	4.3%
Bangiga Adduunka	7,120,435	44,989,295	52,109,729	80.0%
Bangiga Horumarint Afrika	-	1,093,693	1,093,694	1.7%
Midowga Yurub	-	-	-	-
OPEC	-	-	-	-
Hay'adda Caalamiga ah ee Waxbarashada	-	1,640,152	1,640,152	2.5%
Wadarta	**$ 17,408,128**	**$ 47,723,140**	**$ 65,131,268**	**100%**
% Kabka	**27%**	**73%**	**100%**	

Shaxda 2aad: Faahfaahinta Deeqda ee Sannadka 2025

Deeqaha la helay rubaca koowaad ee sannadka 2025 waxay isugu jirtaa kab miisaaniyadeed iyo mid mashaariic. Kabka miisaaniyadeed ayaa 27% ka ah wadarta deeqaha la helay rubaca

koowaad ee sannadka 2025, halka deeqaha mashaariicda ka tahay 73% wadarta deeqaha. Kabka miisaaniyaddu waa deeq dawladdu ka heshay dawlado saaxiib la ah Dawladda Soomaaliya iyo hay'ado caalami ah. Waxayna ku maalgalisaa kharashaadka hawlfuinta dawladda sida mushaaraadka shaqaalaha iyo kharashaadka socodsiinta hawlaha Dawladda. Kabka mashaariicda waa deeq loogu talagalay in lagu maalgaliyo mashaariic horumarineed oo dalka gudahiisa laga fulinaayo.

Deeqda ugu badan waxa ay Dawladdu ka heshay Bangiga Adduunka intii lagu guda jiray rubucii koowaad ee sannad maaliyadeedka 2025. Waxa ay Dawladu ka heshay deeq dhan $52M oo u dhiganta 80% wadarta deeqda dawladdu heshay rubuca koowaad ee sannadka 2025. Dawladda Turkiga ayaa ugu deeqday dawladda $7.5M oo u dhiganta 11.5%, Halka Dawladda Imaaraatka Carabta ugu deeqaday Dawladda deeq dhan $2.8M oo u dhiganta 4.3%. Sidoo kale Hay'adda Caalamiga ee waxbarashada ayaa Dawladda ugu deeqday $1.6M oo u dhiganta 2.5% Marka loo fiiriyo wadarta deeqaha la halay intii lagu guda jiray rubaca koowaad ee sannad maaliyadeedka 2025.



Jaantuska 1aad: Dhabta Qaybaha Dakhliga Rubaca koowaad 2025

Sida ka muuqata shaxda 2aad Dakhliga Gudaha waxaa loo kala qaadaa; Dakhliga Canshuuraha iyo Dakhliyada Kale. Dakhliga Canshuuraha waxaa lasoo uruuriyey $68M oo u dhiganta 43% wadarta dakhliga dawladda, dakhliyada kale waxaa ka soo xarooday $26M una dhiganta 16% wadarta dakhliga Dawladdu heshay rubaca koowaad ee sannad maaliyadeedka 2025.

Deeqaha Dibadda miisaaniyaddu waxa ay u kala qaadaa; kab miisaaniyadeed iyo kab mashaariic. Kabka mashaariicda waxaa laga helay $47M oo u dhiganta 30% wadarta dakhliga Dawladda, halka kabka miisaaniyadeed laga helay $17M oo u dhiganta 11% wadarta dakhliga Dawladdu heshay intii lagu guda jiray rubaca koowaad ee sannad maaliyadeedka 2025.

DHABTA IYO MIISAANIYADDA KHARASHAADKA EE RUBACA 1aad EE SANNADKA 2025

FAAH-FAAHIN	Dhabta Jan-Mar 2025	Kutalagalka Danbe	Kutalagalka Hore	% Fulinta
KHARASHKA GUUD	**186,666,830**	**1,359,714,328**	**1,359,714,328**	**14%**
Kharashaadka Joogtada	**136,027,040**	**631,326,201**	**628,053,674**	**22%**
Mushaarka Shaqaalaha	89,847,577	365,796,085	365,755,765	25%
Isticmaalka Agabka & Adeega	23,513,309	137,064,239	139,587,608	17%
Dulsaarka	1,088,587	13,800,000	13,800,000	8%
Kaalmo Dhaqaale	-	-	-	0
Deeqaha	12,003,409	90,641,266	91,641,266	13%
Faa'iidada Bulshada	-	-	-	0
Hantida aan Maaliyadda Ahayn	9,574,158	24,024,610	17,269,034	55%
Dib u bixin Daymaha/Horumaris	-	-	-	0
Kharashaadka Mashaariicda	**50,639,790**	**728,388,127**	**731,660,654**	**7%**
Mushaarka Shaqaalaha	807,035	4,728,740	4,244,860	19%
Isticmaalka Agabka & Adeega	18,860,081	259,142,076	256,865,498	7%
Kaalmo Dhaqaale	83,908	14,620,000	13,280,000	1%
Deeqaha	13,173,647	143,022,709	147,022,709	9%
Faa'idada Bulshada	-	77,000,000	77,000,000	0%
Kharashad kale	11,728,705	64,427,668	68,416,928	17%
Hantida aan Maaliyadda ahayn	5,986,414	165,446,934	164,830,659	4%

Shaxda 3aad: Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Rubaca koowaad 2025

Rubacii koowaad sannad maaliyadeedka 2025, waxaa la bixiyey kharash dhan $186.7M oo u dhiganta 14% odoroska wadarta miisaaniyada kharashaadka sannad maaliyadeedka 2025. Kharashaadka joogtada ah waxaa la bixiyey $136M oo u dhiganta 22% wadarta kharashaadka miisaaniyadda joogtada ah. Halka kharashaadka mashariicda laga bixiyey $50.6M oo u dhiganta 7% wadarta kharashaadka miisaaniyada mashaariicda ee sannad maaliyadeedka 2025.

Mushaaraadka shaqaalaha ayaa la bixiyey rubaca koowaad ee sannadka 2025 mushaar dhan $90M oo 25% ka ah mushaaraadka miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah ee sannad maaliyadeedka 2025, soo iibsashada hantida aan maaliyadda ahayn ayaa la bixiyey $9.5M oo 55% ka ah miisaaniyadda kharashaadka joogtada, Isticmaalka Agabka iyo Adeega ayaa la bixiyey $23.5M oo 15% ka ah miisaaniyadda kharashaadka joogtada ee Isticmaalka Agabka iyo Adeega.

Hay'adaha	Dhata Jan-Mar 2025	Kutalagalka Danbe	Kutalagalka Hore	% Fulinta
WADARTA KHARASHKA GUUD	**186,666,830**	**1,359,714,328**	**1,359,714,328**	**14%**
Kharashaadka Joogtada	**136,027,040**	**631,326,201**	**628,053,674**	**22%**
Hay'adaha Adeega Maamulka	55,835,904	277,231,471	273,973,094	20%
Hay'adaha Adeega Amniga	60,598,235	257,123,260	257,147,965	24%
Hay'adaha Adeega Dhaqaalaha	8,730,848	45,181,877	45,127,551	19%
Hay'adaha Adeega Bulshada	10,862,053	51,789,592	51,805,063	21%
Kharashaadka Mashaariicda	**50,639,790**	**728,388,127**	**731,660,654**	**7%**
Hay'adaha Adeega Maamulka	19,904,415	161,361,824	164,634,351	12%
Hay'adaha Adeega Amniga	-	-	-	0%
Hay'adaha Adeega Dhaqaalaha	14,459,528	289,506,013	289,506,013	5%
Hay'adaha Adeega Bulshada	16,275,847	277,520,289	277,520,289	6%


Shaxda 4aad: Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Hay'adaha Dawladda

Sida ka muuqata shaxda 4aad, Intii lagu guda jiray saddex biloodka koowaad ee sannadka 2025, kharashaadka joogtada ah lacagta ugu badan waxaa lagu bixiyey Hay'adaha Adeega Amniga, waxaana lagu bixiyey $60.6M oo u dhiganta 24% miisaaniyadda Hay'adaha Adeega Amniga. Hay'adaha Maamulka ayaa lagu bixiyey $55.8M oo u dhiganta 20% wadarta miisaaniyadda Hay'adaha Adeega Maamulka.

Kharashaadka mashaariicda, Intii lagu guda jiray saddex biloodlaha koowaad ee sannad maaliyadeedka 2025, kharashka ugu badan waxaa lagu bixiyey Hay'adaha adeega Maamulka, waxaana lagu bixiyey kharash dhan $19M oo ah 12% wadarta miisaaniyadda loo ansixiyey Hay'adaha Adeega Maamulka. Hay'adaha Adeega Dhaqaalaha iyo Bulshada waxaa lagu kala bixiyey $14.5M(5%) iyo $16M(6%) wadarta miisaaniyadda loo ansixiyey Hay'adaha Adeega dhaqaalaha iyo bulshada.

KHARASHAADKA JOOGTADA AH

Miisaaniyadda Kharashaadka Joogtadu waa miisaaniyad loogu talagalay in lagu bixiyo kharasahaadka hawl socodsiinta hay'adaha Dawladda, sida mushaaraadka shaqaalaha, iyo kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeega ee hay'adaha Dawladda. Waxaana lagu maalgaliyaa Dakhliga Gudaha Dawladda ka aruuriso iyo kab-miisaaniyadeedka ay dawladdu ka hesho deeqaha dibadda.




Jaantuska 2aad: Kharashaadka Joogtada ee la bixiyey Rubaca koowaad 2025

Intii lagu guda jiray saddex biloodka koowaad ee sannad maaliyadeedka 2025, Mushaaraadka Shaqaalaha Dawladda ayaa lagu bixiyey $90M oo u dhiganta 66% wadarta kharashaadka joogtada ah ee laga bixiyay odoroskii miisaniyada sannadka 2025. Mushaaraadka lagu bixiyey kharashaadka joogtada ah waxaa ka mid ah mushaaraadka shaqaalaha rayidka, ciidamada, iyo gunnada siyaasiyiinta.

Kharashaadka Agabka iyo Adeega waxaa lagu bixiyey $23M oo u dhiganta 17% wadarta odoroska kharshaadka joogtada ah. Kharashaadka lagu bixiyey waxaa ka mid ah, howl socodsiinta hay'adaha Dawladda, raashinka iyo shidaalka ciidamada, sahay safarada iyo kharashaadyo kale oo ku baxa adeegyada la siiyo hay'adaha Dawladda. Dulsaaka daymaha ayaa lagu bixiyey kharash dhan $1M oo 8% ka ah odoroska wadarta kharashaadka joogtada ah. Deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada dalka waxaa loo wareejiyey lacag dhan $12M oo ka ah 9% qoondo miisaaniyadeedka kharashaadka joogtada ah ee sannadka 2025. Soo iibsashada hantida aan maaliyadda ahayn ayaa lagu bixiyey $9.5M. Waxaa lagu bixiyey lacagtaan soo iibsashada hantida maguurtada ah intii lagu guda jiray rubca koowaad ee sannadka 2025.

KHARASHAADKA MASHAARIICDA

Jaantuska 3aad wuxuu soo bandhigayaa kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey rubaca koowaad ee sannad maaliyadeedka 2025 meelihii ay ku kala baxeen.



Jaantuska 3aad: Kharashaadka Mashaariicda la bixiyey sannadka 2024

Mushaaraadka shaqaalaha ayaa lagu bixiyey $0.8M oo u dhiganta 0.2% wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey rubaca koowaad ee sannadka 2025. Kharashaadka Agabka iyo Adeega ayaa lagu bixiyey $19M oo ah 37% wadarta kharashaadka mashaariicda ay tahay in la bixiyo sannad maaliyadeedkan. Kharashaadka mashaariicada Waxaa laga bixiyaa kharashaadka ugu badan ee adeega latalinta lasiiyo oo ah lataliyayaasha iyo xiriiriyaasha mashaariicda iyo shirkadaha siiya dawladda adeegyada la xiriira latalinta. Kharashaadka kabka dhaqaale waxaa la bixiyey $0.08M oo u dhiganta 0.02% wadarta kharashaadka mashaariicda. Deeqaha ayaa la bixiyey $13M oo u dhiganta 26% wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey rubaca koowaad ee sannadka 2025.

Soo iibshada hantida aan maaliyadaa ahayn ayaa lagu bixiyey $6M oo u dhigtanta 11% Marka loo fiiriyo wadarta odoroska kharshaadka mahshariicda. Lacagta ugu badan waxaa laga bixiyey mashaariic hoos tagta Wasaaraddaha Beeraha iyo Wasaarada Maaliyada.


ISBADALADA DAKHLIGA DAWLADDA RUBACA 1AAD, 2021-2025

Faah-faahin	Jan-Mar 2021	Jan-Mar 2022	Jan-Mar 2023	Jan-Mar 2024	Jan-Mar 2025
Dakhliga Gudaha	51,950,123	56,883,311	64,897,962	91,713,350	93,890,358
Deeqaha Dibadda	24,967,607	20,471,484	15,983,438	26,698,352	65,131,268
Wadarta Dakhliga Dawladda	**76,917,730**	**77,354,794**	**80,881,400**	**118,411,702**	**159,021,626**
Daymaha/Horumaris	-	35,925,668	-	-	-
Iibinta Hantida	-	3,285,354	-	-	-
Wadarta Maaligelinta	**$-**	**39,211,022**	**$-**	**$-**	**$-**
Wadarta Guud	**$76,917,730**	**116,565,817**	**$80,881,400**	**$118,411,702**	**$159,021,626**


Shaxda 5aad: Dhabta Dakhliga ee Saddex biloodka Sannadaha 2021-2025

Wadarta dakhliga Dawladda ee la helay saddex biloodka koowaad ee sannadka 2025 ayaa ahaa **159M**, wuxuuna ka badan yahay **34%** wadarta dakhligii la helay saddex biloodkii koowaad ee sannadka 2024. Sida ka muuqato shaxda 5aad oo isbarbardhig ku samaynaysa dakhliga Dawladda ee la helay saddex biloodkii koowaad ee sannadaha 2021 ilaa 2025. Kororkii ugu badnaa ee wadarta dakhliga waxa ay Dawladdu heshay saddex biloodkii koowaad ee sannadka 2024, waxaana la helay $118M waxa ay ka badan tahay 46% wadarta dakhliga la helay saddex biloodkii koowaad ee sannadka 2023.

Rubaca koowaad ee sannadka 2022, waxa ka muuqata shaxda 5aad daymo ay dawladdu soo qaadatay si loogu kabo bixinta kharashaadka lagama maarmaanka u ah Dawladda. Waxa ay Dawladdu ka soo qaadatay IMF-ta $36M taasi oo ah SDR (Special Drawing Rights). Ma jirin lacag horumaris ah oo ay Dawladu soo qaadatay intii lagu jiray saddex biloodlaha koowaad ee sannadaha (2021-2025). Iibinta hantida, waxa laga helay qadar lacageed oo dhan $3.3M taasi oo ka timid soo celinta hanti ay lahayd Dowladdii Dhexe ee Soomaaliya wixii ka horeeyey 1991 waxayna ku ku jirtay xisaabaadka Bangiga (JP Morgan). Rubaca koowaad ee sannadaka 2022 ayaa dib loo soo celiyey waxaana lagu soo shubay Khasnadda Dhexe ee dawladda.



Jaantuska 4aad: Dakhliga Dakhliga Gudaha & Deeqaha Dibadda



Jaantuska 5aad: Saamiga Dakhliga Gudaha & Deeqaha Dibadda

Sida ka muuqato jaantuska 4aad, Waxa uu soo bandhigayaa dakhliga Dawladdu heshay saddex biloodlaha koowaad ee sannadaha 2021-2025. saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2025, Dakhliga Gudaha waxaa la helay $94M wuxuuna ka ahaa 59% wadartii dakhliga dawladdu heshay rubaca koowaad ee sannadka 2025, halka Deeqaha Dibadda la helay $65M wuxuuna ka ahaa 41% wadarta dakhliga Dawladda heshay isla rubaca koowaad ee sanaadka 2025.

Saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2021 dakhliga gudaha wuxuu ka ahaa 68% wadarta dakhliga, deeqaha dibadda waxay ka ahaayeen 32% wadarta dakhliga la helay. Marka la eego saddex biloodka koowaad ee sannadka 2025 dakhliga gudaha ayaa 59% ka ahaa wadarta dakhliga la helay, halka deeqaha dibadda ayaa ka ahayeen 41% wadarta dakhliga dawladdu heshay rubaca koowaad ee sannadka 2025.


DAKHLIGA GUDAHA

Dakhliga Gudaha wuxuu samaynaayey koror saddex bilood kasta, waana dakhliga ugu muhiimsan Dawladda oo ay ku maalgaliso kharashaadka Joogtada sida; mushaaraadka shaqaalaha dawladda, iyo kharashaadka hawl socodsiinta hay'adaha dawladda. Dakhliga Gudaha waxaa loo kala qaadaa laba qaybood oo waawayn; Dakhliga Canshuuraha iyo Dakhliyada Kale. Dakhliga Gudaha ayaa kordhay 2% saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2025 marka loo fiiriyo dakhliga gudaha ee la helay rubaca koowaad ee sannadka 2024. Kororkii ugu badnaa ayuu sameeyey saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2024, wuxuuna ka badan yahay 41% wadarta dakhliga gudaha ee la helay saddex biloodlaha koowaad ee sannadkii ka horeeyey 2023.


Nooca	Jan-Mar 2021	Jan-Mar 2022	Jan-Mar 2023	Jan-Mar 2024	Jan-Mar 2025
Dakhliga Canshuurta	39,118,742	41,314,196	45,444,644	65,767,125	67,990,845
Dakhliyada Kale	12,831,381	15,569,114	19,453,318	25,946,225	25,899,513
Wadarta Dakhliga Gudaha	**$51,950,123**	**$56,883,311**	**$64,897,962**	**$91,713,350**	**$93,890,358**
% Koror/Naaqus	-12%	9%	14%	41%	2%

Shaxda 6aad: Dhabta Qaybaha Dakhliga Gudaha saddex biloodkii koowaad 2021-2025

Sida ka muuqata shaxda 6aad saddex biloodkii koowaad ee sannadka 2025 Dakhliga Canshuuraha ayaa la helay $68M, wuxuuna ka badan yahay 3% Dakhliga Canshuuraha ee la helay Jan-Marso 2024. Dakhliyada Kale ayaa la helay saddex biloodka koowaad ee sannadka 2025 dakhli dhan $26M, wuxuuna ka hooseyaa 0.2% wadarta Dakhliyada Kale ee la helay jan-mar 2024. Dakhliga canshuuraha ee la helay saddex biloodka koowaad ee sannadka 2025 wuxuu 72% ka yahay wadarta Dakhliga Gudaha, halka Dakhliyada Kale ay ka yihiin 28% wadarta Dakhliga Gudaha.




Jaantuska 7aad: Qaybaha Dakhliga Gudaha Jan-Mar 2021-2025




Jaantuska 6aad: Saamiga Dakhliga Canshuraha & Dakhliyada Kale

Sida ka muuqato jaantuska 6aad Dakhliga Gudaha, saamiga ugu badan wuxuu ka soo xarooday dakhliga canshuuraha, wuxuuna ka ahaa celcelis ahaan 70% wadarta dakhliga gudaha ee la helay saddex biloodlaha koowaad ee sannadaha 2021 ilaa 2025. Dakhliyada kale ayaa ka ahaa celcelis ahaan 30% wadarta dakhliga gudaha ee la helay isla mudadaas.

Jaantuska 7aad wuxuu soo bandhigayaa wadarta Dakhliga Gudaha soo xarooday rubaca koowaad ee sannadaha 2021-2025; rubacii koowaad ee sannad maaliyadeedkii 2021 waxaa la helay Dakhliga Gudaha oo dhan $52M, halka rubaca koowaad ee sannadkan 2025 soo xarooday Dakhliga Gudaha oo dhan $94M. Wuxuuna sameeyey koror dhan 81% Marka la is barbar dhigo rubaca koowaad ee sannadka 2021 iyo rubaca koowaad ee sannadka 2025.



Jaantuska 9aad: Wadarta Dakhliga Gudaha rubaca koowaad ee Sannadka Gudihiisa



Jaantuska 8aad: Kororka/Naaquska Dakhliga Gudaha rubaca koowaad ee 2021-2025

Sida ka muuqato jaantuska 9aad, wuxuu soo bandhigayaa kororka iyo naaquska wadarta Dakhliga Gudaha ee la halay saddex biloodlaha koowaad ee sannadanaha 2021-2024. Wuxuuna isbabardhig ku samaynayaa rubaca koowaad ee sannadadaha 2021-2025. Marka laga soo bilaabo rubuca koowaad ee sannadka 2021, dakhliga guduhu waxa uu samaynayay koror joogto ah. Koror kii ugu badnaa ee dakhliga guduhu waxa uu sameeyey rubucii koowaad ee sannad maaliyadeedka 2024 kaasi oo la helay dakhli gudaha oo dhan $92M oo u dhigma koror dhan 41% marka la barbardhigo rubucii koowaad ee sannad maaliyadeedka 2023 oo la helay dakhli dhan 65M.

Rubaca koowaad ee sannadka 2024 waxaa kordhay dhammaan qaybaha uu ka kooban yahay dakhliga gudaha marka la barbardhigo qaybaha dakhliga gudaha ee la helay rubaca koowaad ee sannadka 2023. Sida kamuuqata shaxada 7aad Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iida waxa la helay rubca koowaad ee sannadka 2024 dakhli dhan $8.7M wuxuuna ka badan yahay 120% canshuurta dakhliga iyo faa'iidada ee la helay rubaca kowaad ee sannadka 2023. Canshuurta Agabka iyo Adeega ayaa la helay $12.5M, wuxuuna ka sareeyaa 87% canshuurta agabka iyo adeega ee la helay rubaca koowaad ee sannadka 2023.

Rubaca koowaad ee sannadka 2024 waxaa la helay koror dhan $26.8M oo ka badan waradarta dakhliga gudaha ee lahelay rubaca koowaad ee sannadka 2023. kororka ugu badan ayaa laga helay Dakhliga canshuuraha, waxaana laga helay 76%, halka dakhliyada kale lag helay 24%.

Rubaca koowaad ee sannadka 2025, Dakhliga Gudaha ayaa la helay dakhli dhan $94M wuxuuna ka bada yaha 2% Dakhliga Gudaha ee la helay rubaca koowaad ee sannadka 2024.

DAKHLIGA CANSHUURAHA


Canshuurta	Jan-Mar 2021	Jan-Mar 2022	Jan-Mar 2023	Jan-Mar 2024	Jan-Mar 2025
Canshuurta Dakhliga, iyo Faa'iidada	3,017,152	4,129,416	3,993,951	8,781,565	16,123,147
Canshuurta Agabka iyo Adeega	5,809,206	6,685,925	6,698,099	12,493,168	12,286,455
Canshuurta Ganasiga Dibadda	26,520,980	27,743,149	33,519,537	42,721,088	37,427,276
Canshuuraha Kale	3,771,404	2,755,707	1,233,058	1,771,303	2,153,966
Wadarta Dakhliga Canshuurta	**$39,118,742**	**$41,314,196**	**$45,444,644**	**$65,767,125**	**$67,990,845**
% Koror/Naaqus	9%	6%	10%	45%	3%

Shaxda 7aad: Qaybaha Dakhliga Canshuraha Saddex biloodka koowaad ee 2021-2025

Sida ka muuqata shaxda 7aad Dakhliga Canshuuraha ee la helay saddex biloodla koowaad ee sannadka 2025 wuxuu ka badan yahay 3% wadarta dakhliga canshuuraha ee la helay rubucii koowaad ee sannadka 2024.

Dakhliga ugu badan dakhliga canshuuraha wuxuu ka soo xaroodaa Canshuurta Ganacsiga Dibadda. Saddex biloodka koowaad ee sannad-maaliyadeedkan 2025, waxa la helay Canshuurta Ganasiga Dibadda $37M una dhiganta 55% wadarta Dakhliga Canshuuraha. Canshuurta Dakhliga iyo Fa'iidada ayaa la helay $16M una dhiganta 24%, halka Canshuurta Agabka iyo Adeega laga helay $12M oo u dhiganta 18% wadarta Dakhliga Canshuuraha ee la helay saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2025.

Qaybaha uu ka kooban yahay Dakhliga Cashuuraha Intii lagu guda jiray saddex biloodlaha koowaad ee sannadaha 2021-2025, si guud dhammaan waxa ku yimid koror. Canshuurta Dakhliga, iyo Faa'iidada ayaa rubuca koowaad ee sannadka 2025 korortay 84% marka la barbardhigo rubicii koowaad ee sannad maaliyadeedka 2024 oo la helay canshuur dhan $8.8M, sidoo kale Dakhliga canshuuraha kale ayaa kordhay 22%. Halka Dakhliga Cashuurta Agabka & Adeega Iyo Cashuurta Ganacsiga Dibadda uu ku yimid hoos u dhac u dhigma (2%) iyo (12%) Marka loo eego saddex biloodkii koowaad ee 2024.



Jaantuska 10aad: Saamiga Qaybaha Dakhliga Canshuuraha

Saamiga ugu badan Dakhliga Canshuuraha waxa ay ka soo xarootaa canshuurta Ganacsiga Dibadda, waxaana ka soo xaroday 65-55% wadarta Dakhliga Canshuuraha ee la helay saddex biloodka koowaad ee sannadaha 2021-2025. Waxa ayna ka soo xarootaa canshuuraha laga qaado badeecadaha ka soo daga Dekadda iyo Garoonka Diyaaradaha Muqdisho. Canshuurta Agabka iyo Adeega ayaa laga helaa saamiga labaad ee ugu badan Dakhliga Canshuuraha, waxaana ka soo xarooto 19-18% wadarta Dakhliga Canshuuraha. Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidada ayaa waxaa laga helay 13-24% wadarta dakhliga canshuuraha ee la helay rubucii koowaad ee sannadaha 2021-2025.

DAKHLIYADA KALE

Sida ka muuqato shaxda 8aad wadarta Dakhliyada Kale ee la helay saddex biloodka koowaad ee sannadkan 2025 ma jirin wax is badal ah marka loo eego saddex biloodka koowaad sannad maaliyadeedka 2024. Koror kii ugu badnaa waxa la helay saddex biloodkii koowaad ee sannad maaliyadeedka 2024, wuxuuna kordhay 33% marka loo eego saddex biloodkii koowaad ee sannadka 2023. Dakhliga Iibka Agabka iyo Adeega ayaa ah dakhliga ugu muhiimsan ee laga helo dakhliyada kale, wuxuuna kasoo xaroodaa Khidamadaha Maamul ee ay bixiso Dawladda, sida dal-ku-galka ajaanibta, bixinta shatiyada ganacsiga, bixinta baasaboorada, khidmadaha laga qaado diyaaradaha mara hawada Soomaaliya iyo adeegyada dawladdu ka bixiso Dekadda iyo Garoonka Diyaaradaha.

Dakhliga	Jan-Mar 2021	Jan-Mar 2022	Jan-Mar 2023	Jan-Mar 2024	Jan-Mar 2025
Dakhliga Hantida	0	0	44,086	197,580	180,150
Dakhliga Iibka Agabka iyo Adeegga	12,831,381	15,569,114	19,409,232	25,676,598	25,506,192
Ganaaxa, Ciqaabta iyo Luminta Dacwadaha	0	0	0	72,047	213,171
Wadarta Dakhliyada Kale	**$ 12,831,381**	**$15,569,114**	**$19,453,318**	**$25,946,225**	**$25,899,513**
% Koror/Naaqus	**-45%**	**21%**	**25%**	**33%**	**0%**

Shaxda 8aad: Dakhliyada Kale Saddex biloodkii koowaad ee sannadaha- 2021-2025

Dakhliga ka soo xarooda khidmadaha maamul ee Dekadda iyo Garoonka Diyaaradaha Muqdisho ayaa ahaa 10.4M oo u dhiganta 40% wadarta Dakhliyada Kale ee soo xarooday saddex biloodka koowaad ee sannadka 2025. Khidmadaha laga qaado diyaaradaha mara hawada Soomaaliya waxaa laga helay $5.4M oo u dhiganta 21% wadarta Dakhliyada Kale ee la helay dhamaadka saddex biloodka koowaad ee sannadka 2025. Wadarta Khidmadaha maamul ee laga helay Dekadda, Garoonka diyaaradaha Muqdishu, iyo diyaaradaha mara hawada Soomaliya ayaa ahayd $16M oo u dhiganta 61% wadarta Dakhliyada Kale ee la helay saddex biloodka koowaad sannad maaliyadeedka 2025.

DEEQAHA DIBADDA

Dakhliga	Jan-Mar 2021	Jan-Mar 2022	Jan-Mar 2023	Jan-Mar 2024	Jan-Mar 2025
Deeqaha Labada Dhinac	0	0	0	5,641,619	10,287,693
Deeqaha Dhinacyada Badan	24,967,607	20,471,484	15,983,438	21,056,733	54,843,575
Wadarta Deeqaha Dibadda	**$24,967,607**	**$20,471,484**	**$15,983,438**	**$26,698,352**	**$65,131,268**
% Koror/Naaqus	**-62%**	**-18%**	**-22%**	**67%**	**144%**

Shaxda 9aad: Deeqaha Dibadda, 2021-2025

Deeqaha dibadda ee la helay saddex biloodka koowaad sannadka 2025 waxa ay 144% ka badan tahay deeqdii la helay saddex biloodka koowaad sannadka 2024 oo ahayd $26.7M. Saddex biloodka kasta deeqda ugu badan ee la helay ayaa ah deeqaha dhinacyada badan. Saddex biloodka koowaad sannadka 2023 waxa la helay deeqdii ugu hoosaysay oo ah 16M, waxa ay 22% ka hoosaysaa deeqdii la helay saddex biloodkii koowaad ee 2022. Deeqda dhinacyada badan inta badan waxaa lagu bixiyaa kharashaadka mashariicda.

Deeqda Bixisay	Jan-Mar 2021	Jan-Mar 2022	Jan-Mar 2023	Jan-Mar 2024	Jan-Mar 2025
Turkiga	-	-	-	-	7,500,000
Imaaraatka Carabta	-	-	-	5,641,619	2,787,693
Shiinaha	-	-	-	-	-
Wadarta	**-**	**-**	**-**	**5,641,619**	**10,287,693**

Shaxda 10aad: Dhabta Deeqaha labo dhinacle ah ,2021-2025

Shaxda10aad waxay muujinaysaa wadamada laga helay deeqaha laba dhinaclaha ah ee loogu deeqay Dawladda saddex biloodka koowaad ee sannadaha 2021-2025. Saddex biloodkii koowaad sannad maaliyadeedkan 2025 Deeqda ugu badan Dawladu waxa ay ka heshay Dawladda Turkiga deeq dhan $7.5M, sidoo kale Imaaraatka Carabta ayaa Dawladda ugu deeqay $2.8M, saddex biloodkii koowaad ee sannadka 2023, Dawladda Imaaraatka Carabta kaliya ayey Dawladu ka heshay deeq lacageed oo dhan $5.6M. Ma jirto deeqo ay Dawladu ka heshay saddex biloodkii koowaad ee sannadaha 2021, 2022 Iyo 2023.

Deeqda Bixiyaha	Jan-Mar 2021	Jan-Mar 2022	Jan-Mar 2023	Jan-Mar 2024	Jan-Mar 2025
Bangiga Addunka - IDA	11,291,682	3,868,496	12,259,663	15,481,130	38,307,109
Bangiga Addunka - MPF	13,067,995	13,618,539	2,300,242	4,073,394	13,802,620
Bangiga Hourmarinta Afrika	446,705	1,570,842	1,099,381	983,755	659,480
Sanduuqa Horumarinta Afrika	161,224	-	110,257	192,782	434,214
Midowga Yurub	-	-	-	-	-
Qaramada Midoobay	-	-	-	-	1,295,658
Ha'yadda Iskaashaiga Waxbarashada (GPE)	-	1,413,606	213,894	325,672	344,494
OPEC – Wadama Soosaara Shidaalka	-	-	-	-	-
Wadarta Deeqada	**$24,967,607**	**$20,471,484**	**$15,983,438**	**$21,056,733**	**$54,843,575**
% Koror/Naaqus	**-62%**	**-18%**	**-22%**	**32%**	**160%**

Shaxda 11aad: Dhabta Deeqda Dhinacyada Badan, 2021-2025

Wadarta Deeqda dhinacyada badan ee la helay rubaca koowaad ee sannadka 2025 waxay ka badan tahay 160% deeqdii la helay rubaca koowaad ee sannadkii ka horeeyey ee 2023.

Shaxda 11aad ayaa soo bandhigayso hay'adaha laga helay deeqaha dhinacyada badan. Bangiga Adduunka oo laga helay isku darka deeqaha IDA iyo MPF ayaa ahayd lacag dhan $52M oo u dhiganta 95% wadarta deeqaha dhinacyada badan ee loogu deeqay Dawladda rubaca koowaad sannad maaliyadadeedka 2025.

Faahfaahin	Jan-Mar 2021	Jan-Mar 2022	Jan-Mar 2023	Jan-Mar 2024	Jan-Mar 2025
Kabka Miisaaniyadda	6,500,000	5,309,061	0	7,792,758	17,408,128
Kabka Mashaariicda	18,467,607	15,162,422	15,983,438	18,905,594	47,723,140
Wadaarta Deeqda	**24,967,607**	**20,471,484**	**15,983,438**	**26,698,352**	**65,131,268**

Shaxda 12aad: Deeqaha Kabka iyo Deeqaha Mashaariicda

Sida ka muuqato shaxda 12aad Deeqaha Dibadda oo ay dawladda heshay rubaca koowaad ee sannadka 2025 waxaa kab miisaaniyadeed ka ah 27% wadarta deeqaha la helay; kab miisaaniyadeedku waa deeq dawladda loo siiyey inay ku bixiso kharashaadkeeda joogtada ah, iyadoo lagu salaynaayo mudnaanta kharash bixinta ee hay'adaha dawladda, sida inay ku bixiso kharashaadkeeda hawlfulinta.

Kabka mashaariicda ayaa ka ah 73% wadarta deeqaha la helay rubaca koowaad sannadka 2025, waxaana lagu bixiyaa kharashaadka mashaariicda ay hay'adaha caalamiga ka fuliyaan gudaha dalka.


Dakhliga Gudaha iyo Kharashaadka Hawlfulinta Dawladda

Kharashaadka la barbardhigi doono dakhliga gudaha kuma jiraan kharashaadka mashaariicda oo laga maalgaliyo kabka mashaariicda oo ay dawladdu hesho sannad kasta. Sidoo kale waxaa laga reebay lacagaha loo wareejiyo dawlad goboleedyada dalka ee laga bixiyo kabka miisaaniyadeed ay dawladdu hesho.

Faahfaahin	Jan-Mar 2021	Jan-Mar 2022	Jan-Mar 2023	Jan-Mar 2024	Jan-Mar 2025
Dakhliga Gudaha	51,950,123	56,883,311	64,897,962	91,713,350	93,890,358
Kharashaadka Dowladda	75,543,776	79,860,020	88,465,874	107,190,293	133,535,949
% Dakhliga Gudaha	**69%**	**71%**	**73%**	**86%**	**70%**

Shaxda 13aad: Dakhliga Gudaha iyo Kharashaadka Dawladda, 2021-2025

Shaxda13aad waxaa ka muuqdo dhabta Dakhliga Gudaha ee la helay rubaca koowaad ee sannadaha 2021-2025 iyo kharashaadka hawlfulinta ay dawladdu bixisay sannadaha 2021–2025. Sida ay soo bandhigayso shaxda 13aad, Dakhliga Gudaha ayaa daboolay 70% kharashaadka hawlfulinta ay dawlaaddu bixisay rubaca koowaad ee sannadka 2025. Sidoo kale, sannadka 2023 Dakhliga Gudaha wuxuu daboolay 86% kharashaadka hawlfulinta dawladda ee la bixiyey rubaca koowaad ee sannadka. Farqiga ka muuqdo jaantuska 12aad oo u dhaxeeya dakhliga gudaha iyo kharashaadka hawlfulinta Dawladda waxaa laga bixiyey haraaga dawladda ka soo wareegay sannadkii hore iyo deeqaha kabka miisaaniyadda ay dawladdu ka heshay deeqaha dibadda ee la helay rubaca koowaad ee sannadaha 2021-2025.



Jaantuska 11aad: Dakhliga Gudaha & Kharashaadka Hawlfulinta

Sida ka muuqato jaantuska 11aad, wuxuu faahfaahinayaa kabka deeqaha dibadda ee lagu kabay kharashaadka hawlfulinta oo ay dawladdu bixisay rubaca koowaad ee sannadaha 2021-2025. Rubaca koowaad ee sannadka 2025 waxaa lagu kabay kharashaadka hawlfulinta dawladda lacaga $40M oo u dhigtanta 30% wadarta kharashaadka hawlfulinta dalwadda ee la bixiyey. Sidoo kale rubaca koowaad ee sannadka 2024 ayaa lagu kabay 15M oo u dhiganta 14% wadarta kharashaadka hawlfulinta ee la bixiyey rubacaas. Rubaca koowaad ee sannadka 2023 ayaa lagu kabay kharashaadka hawlfuilnta lacag dhan 24M oo u dhiganta 27% wadarta kharashaadka la bixiyey rubaca.

Faahfaahin	Jan-Mar 2021	Jan-Mar 2022	Jan-Mar 2023	Jan-Mar 2024	Jan-Mar 2025
Dakhliga Gudaha	51,950,123	56,883,311	64,897,962	91,713,350	93,890,358
Mushaarka Shaqaalaha	55,551,220	61,250,547	64,025,924	80,142,282	89,847,577
Farqiga Dakhli-Kharash	**$ (3,601,097)**	**$ (4,367,236)**	**$ 872,037**	**$ 11,571,067**	**$ 4,042,781**
% Farqiga	94%	93%	101%	114%	104%

Shaxda 14aad: Dakhliga Gudaha Vs Mushaaraadka Shaqaalaha, 2021-2025

Shaxda 14aad waxay soo bandhigaysaa isbarbardhiga dakhliga gudaha iyo wadarta mushaaraadka shaqaalaha dawladda ee la bixiyey rubaca koowaad ee sannadaha 2021-2025. Marka laga reebo rubaca koowaad ee sannadaha 2021 iyo 2022 dakhliga gudaha ayaa daboolay 100% bixinta mushaaraadka shaqaalaha dawladda ee la bixiyey rubaca koowaad ee sannadaha 2023-2025.

Sannadaha 2021 iyo 2022 bixinta mushaaraadka shaqaalaha waxaa lagu kabay deeqaha laga helo dibadda ee kabka miisaaniyadeed ahaan dawladda loo siiyey. Sannadka 2021 waxaa lagu kabay lacag dhan $3.6M oo u dhiganta 6% wadarta mushaarka shaqaalaha ee la bixiyey. Sidoo kale sannadka 2022 ayaa lagu kabay bixinta mushaaraadka shaqaalaha lacag dhan $4.4M oo u dhigtanta 7% wadarta mushaaradka shaqaalaha dawladda ee la bixiyey rubaca koowaad ee sannadka 2022.

DAYMAHA DAWLADDA 2021-2025

Daymaha dawladda waxaa loo kala qaaday labo qaybood; qaybta koowaada waa dayn lasoo qaatay sannadahaan danbe oo loo isticmaalay in lagu bixiyo kharashaadka joogtada ah ee ku jira miisaaniyadda sannadaha lasoo qaatay daynta, qaybta labaad waa daymaha muddada fog oo ay soo qaadatay dawladdii dhexe wixii ka horeeyey sannadkii 1991dii.

Faahfaahin	Jan-Mar 2021	Jan-Mar 2022	Jan-Mar 2023	Jan-Mar 2024	Jan-Mar 2025
Daymaha Gudaha	-	-	-	-	-
Daymaha Dibadda	-	35,925,668	-	-	-
Wadarta Daymaha	**-**	**$35,925,668**	-	-	**-**

Shaxda 15aad: Daymaha Dawladda

Shaxda15aad waxay soo bandhigaysaa dayamaha ama horumariska ay dawladdu soo qaadatay 2021-2025. Waxayna dawladda u isticmaashay inay ku bixiso kharashaadka dawladda ee ku jira miisaaniyadda dawladda. Daymaha dibadda waa lacag la sarifay oo SDR (Special Drawing Rights) ahaan dawladda loo siiyey, waxaa laga helay Hay'adda Lacagta Aduunka (IMF). SDR-ta ayaa loo siisay labo qaybood oo isla eg; Hanti (Asset) iyo Qoonodo (Allocation), waxayna dawladdu ka sarifatay hantida-SDR lacag $36M oo SDR la sarifay. Inta ay dawladdu dib u buuxinayso Hantida-SDR ay kala baxday waxay ka mid noqonaysaa daymaha dibadda ee dawladda lagu leeyahay. Waxaa loo isticmaalay bixinta Kharashaadka joogta ee dawladda sannadka 2022.


Daymaha Gudaha waa lacago hourmaris ah oo Wasaaradda Maaliyadda ka qaadatay Bangiga Dhexe si loogu bixiyo mushaaraadka shaqaalaha dawladda, dhammaan horumariska laga qaatay Bangiga Dhexe waxaana dib loo siiyey isla sannadka daynta la qaatay gudiisa, waxayna ka muuqan doontaa qaybta kharashaadka.

ISBADALKA DHABTA KHARASHAADKA DAWLADDA, 2021-2025

Hay'adaha	Jan-Mar 2021	Jan-Mar 2022	Jan-Mar 2023	Jan-Mar 2024	Jan-Mar 2025
Hay'adaha Adeega Maamulka	38,236,725	40,184,946	43,867,613	49,423,096	75,740,319
Hay'adaha Adeega Amniga	36,208,611	38,569,900	43,912,858	56,057,780	60,598,235
Hay'adaha Adeega Dhaqaalaha	6,227,667	9,998,157	8,604,191	12,281,065	23,190,376
Hay'adaha Adeega Bulshada	4,940,770	5,569,655	5,737,650	8,623,933	27,137,901
WadartaKharashka	**$85,613,772**	**$94,322,659**	**$102,122,312**	**$126,385,875**	**$186,666,830**
%Koror/Naaqus	-73%	10%	8%	24%	48%

Shaxda16aad: Dhabta Kharashaadka Hay'adaha,2021-2025

Sida ka muuqato shaxda 17aad wadarta kharashaadka la bixiyey saddex biloodka koowaad sannadka 2025 wuxuu ka badan yahay 48% wadarta kharashaadka la bixiyey saddex biloodkii koowaad sannadka 2024. Kharashaadka la bixyey saddex biloodka koowaad sannadka 2025 waxaa kharashaadka joogtada ah ka ahaa 73% wadarta kharashaadka la bixiyey sannadka 2025, halka 23% ahayd kharashaadka mashaariicda oo laga maalgaliyey kabka mashaariicda oo ay dawladdu heshay rubaca koowaad ee sannadka 2025 iyo haraaga mashaariicda kasoo wareegay sannadkii 2024. Sannadka 2024 wuxuu kordhay kharashka 24% marka la barbardhigo kharashaadkii baxay rubaca koowaad ee sanaadka 2023.



Jaantuska 12aad: Kharashaadka Hay'adaha Dawladda

Sida ka muuqato jaantuska 13aad, wuxuu soo bandhigayaa kharashaadka la bixiyey rubaca koowaad ee sannadaha 2021-2025 oo waafaaqsan kala sooca shaqo ahaan ee hay'adaha dawladda.

Celcelis ahaan rubacyada koowaad ee 5tii sano ee la soo dhaafay 42% kharashaadka dawladda waxaa lagu bixiyey Hay'adaha Adeega Maamulka, 40% waxay ku baxeen Hay'adaha Adeega Amniga, 10% waxaa lagu bixiyey Hay'adaha Adeega Dhaqaalaha, 9% waxay ku baxday Hay'adaha Adeega Bulshada marka loo fiiririyo wadarta kharashaadka la bixiyey rubacyada koowaad ee sannadaha 2021-2025.

Tirade guud ee hay'adah dawladda ayaa ah 68, Hay'adaha Adeega Maamulka waa ku jira 31 hay'adood, Hay'adaha Adeega Amniguna waa 8 hay'adood, Hay'adaha Adeega Dhaqaalaha sidoo kale waxa ku jira 20 hay'adood, halka Hay'adah Adeega Bulshada ay ka kooban yihiinku 9 hay'adooda. Faahfaahinta magacyada haya'adaha waxaa ka heli kartaa lifaaqyada warbixinta.

Noocyada Kharashaadka

Nooca Kharashka	Jan-Mar 2021	Jan-Mar 2022	Jan-Mar 2023	Jan-Mar 2024	Jan-Mar 2025
Mushaarka Shaqaalaha	56,078,186	61,448,857	64,228,537	80,562,507	90,654,612
Isticmalka Agabka & Adeega	13,762,550	17,890,132	19,650,778	28,121,036	42,373,390
Dulsaarka	352,125	86,610	50,483	156,205	324,248
Kabka	135,228	149,994	320,000	1,659,990	83,908
Deeqaha	9,623,040	12,304,268	12,167,932	13,915,882	25,177,056
Fa'idada Bulshada	0	0	2,982,865	0	0
Othr Expense	0	0	0	0	11,728,705
Hantida aan Maaliyadda Ahayn	1,806,126	916,084	1,004,634	1,205,916	15,560,572
Dib u Bixinta Daymaha	3,856,519	1,526,714	1,717,083	764,339	764,339
Wadarta Kharashaadka	**$ 85,613,772**	**$ 94,322,659**	**$ 102,122,312**	**$ 126,385,875**	**$ 186,666,830**

Shaxda17aad: Noocyada Kharashaadka la Bixiyey, 2021-2025

Sida ka ka muuqato shaxda 17aad oo soo bandhigayso noocyada kharashaadka la bixiyey sannadaha 2021-2025, Musharaadka shaqaalaha dawladda ee la bixiyey saddex biloodkii koowaad sannadka 2025 ayaa ahaa $90.6M oo 49% ka ah wadarta kharashaadka la bixiyey saddex biloodkii koowaad sannadka 2025. Kharashaadka Adeega iyo Agabka ayaa la bixiyey $42.3M oo u dhiganta 23% wadarta kharashaadka la bixiyey. Deeqaha dawladda ee la siiyo dawlad goboleedyada dalka ayaa lagu bixiyey $25M oo u dhiganta 14% wadarta kharashaadka dawladda ee la bixiyey saddex biloodkii koowaad sannadka 2025.

MUSHAARAADKA SHAQAALAHA

Nooca Kharashka	Jan-Mar 2021	Jan-Mar 2022	Jan-Mar 2023	Jan-Mar 2024	Jan-Mar 2025
Mushaarka	35,744,058	37,792,692	39,781,301	49,142,589	50,137,721
Gunnada	17,743,067	20,375,545	21,827,121	26,222,473	31,729,466
Kharashaadka Kale ee Shaqaalaha	2,591,062	3,280,620	2,620,116	5,197,445	8,787,425
Wadarta Mushaarka	**$56,078,186**	**$61,448,857**	**$64,228,537**	**$80,562,507**	**$90,654,612**
% Koror/Naaqus	-66%	10%	5%	25%	13%

Shaxda 18aad: Mushaaraadka Shaqaalaha, 2021-2025

Shaxda 18aad waxay soo bandhigaysaa bixinta musharaadka shaqaalaha dawladda, waxaana la bixiyey $90.6M oo 13% ka badan mushaaraadka shaqaalaha la bixiyey saddex biloodkii koowaad sannadka 2024. Sidoo kale saddex biloodka koowaad ee sannadka 2024 waxaa lagu bixiyey mushaaraadka shaqaalaha $80.5M oo ka badan 25% mushaaraadkii la bixiyey saddex biloodkii koowaad sannadka 2023. Kororka ugu badan Mushaarka shaqaaluhu waxa uu sameeyay saddex biloodkii koowaad sannad maaliyadeedka 2024 sida kor ku xusan waxa uu sameeyay koror dhan 25%.


Mushaaraadka shaqaalaha ee la bixiyey saddex biloodka koowaad sannadka 2025 waxa kharashaadka joogtada ka baxay 99% Halka mushaarka kharashaadka mashaariicda ay ka baxeen 1% wadarta mushaaraadka shaqaalaha la bixyey saddex biloodka koowaad ee sannadka 2025.

Hay'adaha	Jan-Mar 2021	Jan-Mar 2022	Jan-Mar 2023	Jan-Mar 2024	Jan-Mar 2025
Hay'adaha Adeega Amniga	31,379,499	32,824,369	37,205,202	46,953,213	49,707,416
Hay'adaha kale	24,698,687	28,624,488	27,023,335	33,609,294	40,947,196
Wadarta Mushaarka	**$ 56,078,186**	**$ 61,448,857**	**$ 64,228,537**	**$ 80,562,507**	**$ 90,654,612**


Shaxda 19aad: Mushaaraadka Hay'adaha Adeega Amnig iyo Hay'adaha kale

Mushaaraadka la bixiyey saddex biloodka koowaad ee sannadka 2025, shaqaalaha Hay'adaha Amniga waxaa lagu bixiyey $49.7M oo u dhiganta 55% wadarta mushaarka la bixiyey, meelaha ay ku baxeen Mushaaradku waxa ka mid ah; Ciidamada Xooga Dalka, Ciidanka Booliska Soomaaliyeed, iyo hay'adaha kale ee hoos yimaada Hay'adaha Adeega Amniga. Hay'adaha aan hoos imaanin Hay'adaha Amniga waxaa lagu bixiyey $40.9M oo u dhiganta 45% wadarta mushaaraadka la bixiyay. Saddex biloodkii koowaad sannadka 2024 waxaa lagu bixiyey hay'adaha amniga $47M oo u dhiganta 58% wadarta mushaarka la bixiyey, hay'adaha kale waxaa lagu bixiyey $33.6M oo u dhigant 42% wadarta mushaaraadka la bixiyey saddex biloodka koowaad sannadka 2024.

Saddex biloodkii koowaad sannadka 2025 waxaa kordhay bixinta mushaarka shaqaalaha dawladda; hay'adaha adeega amniga ayaa kordhay $2.7M oo dhiganta 6% kororka saadex biloodkii koowaad sannadka 2025. Halka Hay'addaha kale Mushaarka shaqaaluhu ay ka kordheen 7.3M oo u dhiganta 22%. Hay'adaha kale waxaa ku jira inta badan hay'adaha dawladda, waxaana laga reebaa oo kaliya 8 hay'adood oo ku jira Hay'adaha Aminga, tirada guud ee hay'adaha dawladda ee ku jiray miisaaniyadda sannadka 2025 ayaa ahayd 68 hay'adood.



Jaantuska 14aad: Mushaarka Hay'adaha Amniga iyo Hay'adaha kale



Jaantuska 13aad: Saamiga Mushaarka Hay'adaha Amniga iyo Hay'adaha kale

KHARASHAADKA ISTICMAALKA AGABKA IYO ADEEGA


Nooca Kharashka	Jan-Mar 2021	Jan-Mar 2022	Jan-Mar 2023	Jan-Mar 2024	Jan-Mar 2025
Safarka iyo Shirarka	**283,423**	**755,197**	**1,429,513**	**1,836,642**	**2,228,678**
Safarka iyo Shirarka	283,423	755,197	1,429,513	1,836,642	2,228,678
Kharashaadka Hawl-Fulinta	**1,705,515**	**2,579,039**	**3,189,692**	**4,184,058**	**5,018,301**
Hawlaha Guud	468,482	543,334	711,197	725,763	944,717
Isgaarsiinta	0	0	33,112	46,543	35,412
Shidaalka iyo Saliidaha	572,290	939,880	1,110,343	2,116,130	1,861,420
Agabka iyo Alaabaha	389,210	723,900	821,504	892,771	1,342,028
Dayactir iyo Hagaajin	275,532	371,925	513,535	402,850	834,724
Kharshaadka Kirooyinka	**455,268**	**264,465**	**476,080**	**810,390**	**1,701,374**
Kirooyinka	455,268	264,465	476,080	810,390	1,701,374
Kharshaadka kale ee Hawl-Fulinta	**4,733,765**	**7,177,098**	**6,982,889**	**12,419,692**	**22,249,703**
Waxbarashada iyo Tababaradda	199,790	249,010	191,838	45,112	142,285
Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	3,431,456	5,279,334	5,655,041	10,596,643	18,749,646
Adeegyadda Bangiga	1,102,519	1,648,754	1,075,701	1,745,084	3,184,482
Xayeysiinta iyo Heshiis Wax kala Iibsi	0	0	60,309	21,853	145,790
E kCaymiska Dadka Guud	0	0	0	11,000	27,500
Hawlgaladda Ciidamada	**2,103,581**	**140,000**	**1,171,508**	**1,236,118**	**1,249,086**
Booliska - Agabka iyo Adeegyada	763,972	0	40,000	60,000	35,000
Sirdoonka- Agabka iyo Adeegga Ciidanka	1,182,341	50,000	891,508	936,118	788,086
Xoogga- Agabka iyo Adeegga Ciidanka	157,268	90,000	240,000	240,000	426,000
Kharashaadka Guud ee kale	**4,480,999**	**6,974,334**	**6,401,097**	**7,634,136**	**9,926,248**
Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	4,480,999	6,974,334	6,401,097	7,634,136	9,926,248
Wadarta Kharashaadka	**$13,762,550**	**$17,890,132**	**$19,650,778**	**$28,121,036**	**$42,373,390**
% Koror/Naaqus	**-85%**	**30%**	**10%**	**43%**	**51%**

Shaxda 20aad: Isticmaalka Agabka iyo Adeega la bixiyey, 2021-2025

Sida ka muuqato shaxda 20aad, kharashaadka Agabka iyo Adeega ee la bixiyey saddex biloodka koowaad sannadka 2025 waxa uu dhan yahay $42.3M wuxuu ka badan yahay 51% kharashaadka Agabka iyo Adeega ee la bixiyey saddex biloodkii koowaad sannadka 2024. Sidoo kale saddex biloodkii koowaad ee sannadka 2024 waxaa la bixiyey $28M waxa uu ka badan yahay 43% kharashaadka Agabka & Adeega ee la bixiyay saddex biloodkii koowaad ee sannadka 2023.

Kharashaadka Agabka iyo Adeega ee la bixiyey saddex biloodka koowaad sannadka 2025 waxaa kharashaadka joogtada laga bixiyay $23.5M oo 55% ka ah wadarta la bixiyey, halka kharashaadka mashaariicda la bixiyey ahayd $18.7M oo dhiganta 45% wadarta kharashaadka Agabka iyo Adeega la bixiyey saddex biloodkii koowaad sannadka 2025.


Kororka ugu badan wuxuu ka yimid madaxa adeega latalinta, waxaana la bixiyey $8M ka badan wadarta kharashaadkii la bixiyey saddex biloodkii koowaad sannadka 2024 oo ahaa 10.6M ee madax latalinta. Wuxuuna u 44% ka yahay kharashaadka Guud ee Adeega iyo Agabka la bixiyey saddex biloodka koowaad sannadka 2025.



Jaantuska 15aad: Kharashaadka Safarka & Shirarka

Kharashaadka safarka iyo shirarka waxaa ku baxday saddex biloodkii koowaad sannadka 2025 kharash dhan $2.2M oo 21% ka badan wadarta Kharashaadka safarka iyo shirarka ee la bixiyey saddex biloodkii koowaad sannadka 2024. Waxayna 5% ka tahay wadarta kharashaadka Agabka iyo Adeega ee la bixiyey rubaca koowaad ee sannadka 2025.

Kharashaadka Joogtada ah ee Safarka iyo Shirarka waxaa laga bixiyey $1M oo u dhiganta 45% wadarta kharashaadka safarka iyo shirarka ee la bixiyey saddex biloodka koowaad sannadka 2025, kharashaadka mashaariicdane waxaa laga bixiyey $1.2M oo u dhiganta 55% wadarta kharashaadka safarka iyo shirarka ee la bixiyey saddex biloodka koowaad sannadka 2025.




Jaantuska 16aad: Kharashaadka Hawlfulinta

Kharashaadka hawlfulinta waxaa la bixiyey saddex biloodka koowaad sannadka 2025 qadar dhan $5M waxa ay 20% ka badan tahay kharashaadka hawlfulinta ee la bixiyey saddex biloodka koowaad sannadka 2024. Sidoo kale, saddex biloodkii koowaad sannadka 2024 waxaa la bixiyey $4M waxa ay 31% ka badan tahay kharashaadka hawlfulinta ee la bixiyey saddex biloodkii koowaad sannadka 2023.

Kharaashaadka hawlfulinta ee la bixiyey saddex biloodkii koowaad sannadka 2025 waxay 12% ka tahay kharashaadka Guud Agabka & Adeega ee la bixiyay saddex biloodkii koowaad sannadka 2025.

Kharashaadka Hawl fulinta, Kharashaadka joogtada ah waxaa laga bixiyey $4M oo u dhiganta 80% kharashaadka hawlfulinta ee la bixiyey saddex biloodka koowaad sannadka 2025, kharashaadka mashaariicda waxaa laga bixiyey $1M oo 20% ka ah wadarta kharashaadka hawlfulinta ee la bixiyey saddex biloodka koowaad sannadka 2025.


Kharashaadka kirooyinka waxaa la bixiyey saddex biloodkii koowaad sannadka 2025 kharash dhan $1.7M, waxayna ka badan tahay 110% kharashaadkii kirada ee la bixiyey saddex biloodkii koowaad sannadka 2024. Sidoo kale Kharshaadka la bixiyey saddex biloodkii koowaad ee sannadka 2024 wuxuu 70% ka badan yahay kharashaadka kirooyinka ee la bixiyey saddex biloodkii koowaad ee sannadka 2023.



Jaantuska 17aad: Kharashaadka Kirooyinka

Kharashaadka kirooyinka waxay 4% ka tahay wadarta kharshaadka Agabka iyo Adeega ee la bixiyey saddex biloodkii koowaad sannadka 2025.

Kharashaadka joogtada waxaa laga bixiyey $0.5M oo 31% ka ah kharashaadka kirooyinka, kharashaadka mashaariicda waxaa laga bixiyey $1.2M oo 69% ka ah wadarta kharashaadka kirooyinka ee la bixiyey saddex biloodkii koowaad sannadka 2025.




Jaantuska 18aad: Kharashaadka Kale ee Hawlfulinta

Kharashaadka kale ee hawlfulinta waxaa la bixiyey saddex biloodkii koowaad sannadka 2025 lacag dhan $22M, waxayna ka badan tahay 79% kharashaadka kale hawlfulinta ee la bixiyey saddex biloodkii koowaad ee sannadka 2024. Sidoo kale, saddex biloodkii koowaad sannadka 2024 wuxuu ka badan yahay 78% kharashaadka kale hawlfulinta ee la bixiyey saddex biloodkii koowaad ee sannadka 2023.


Kharashaadka kale ee hawlfulinta waa kharashka ugu badan ee la bixiyey kharasahaadka Agabka iyo Adeega, wuxuuna ka yahay 53% wadarta kharashaadka Agabka iyo Adeeg ee la bixiyey sannadka 2025.

Kharashaadka joogtada waxaa laga bixiyey $6.8M oo dhiganta 31% wadarta kharashaadka kale ee hawlfulinta, kharashaadka mashaariicda waxaa laga bixiyey $15.4M oo u dhiganta 69% wadarta kharashaadka kale ee hawlfulinta ee la bixiyey saddex biloodkii koowaad sannadka 2025.

Kharashaadka hawlgalada ciidamada waxaa laga bixiyey saddex biloodkii koowaad sannada 2025 lacag dhan $1.2M waxayna ka badan tahay 1% kharashaadka hawgalada ciidanka ee la bixiyey saddex biloodkii koowaad sannadka 2024. Kharashaadka hawlgalada ciidamad ee la bixiyey sannadka 2024 wuxuu ka badan yahay 6% marka la barbardhigo kharashaadka hawlgalada ciidamda ee la bixiyey sannadka 2023. Kharashaadka baxay ee hawlgalada ciidamada dhamaan waxa laga bixiyey miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah.



Jaantuska 19aad: Kharashaadka hawlgalada Ciidamada



Jaantuska 20aad: Kharashaadka Guud ee kale

kharashaadka kale ee Guud waxaa la bixiyey rubaca koowaad ee sannadka 2025 $9.9M, wuxuuna ka badan yahay 30% kharashaadka kale ee Guud ee la bixiyey saddex biloodka koowaad sannadka 2024. Halka saddex biloodkii koowaad sannadka 2024 laga bixiyay 7.6M waxa uuna ka badan yahay 19% kharashaadka kale guud ee la bixiyey saddex bildookii koowaad ee sannadka 2023. Kharashaadka kale ee guud badankiis wuxuu ka baxay miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah.

DULSAARKA DAYMAHA

Kharashka	Jan-Mar 2021	Jan-Mar 2022	Jan-Mar 2023	Jan-Mar 2024	Jan-Mar 2025
Dulsaarka la Siinayo Dadka aan Deganayn Dalka	352,125	86,610	50,483	156,205	324,248
Dulsaarka la Siinayo Dadka Degan Dalka	0	0	0	0	0
Wadarta	**$352,125**	**$86,610**	**$50,483**	**$156,205**	**$324,248**

Shaxda 21aad: Dulsaarka Daymaha, 2021-2025

Shaxda 21aad waxay muujinaysaa dulsaarka daymaha ee la bixiyey sannadaha 2021 ilaa 2025. Waxaa la siiyaa hay'adaha caalamiga ah ee daynta mudada fog kulahaa Dawladda. Rubaca koowaad ee sannadka 2025 waxaa la bixiyey $324K oo ka badan 108% wadarta kharashaadka dulsaarka ee la bixiyey rubaca koowaad ee sannadka 2024.

Kaalmo Dhaqaale

Kharashka	Jan-Mar 2021	Jan-Mar 2022	Jan-Mar 2023	Jan-Mar 2024	Jan-Mar 2025
Kabka lasiiyo Shirkadaha Gaarka ah aan ka Shayqaynin Maaliyadda	$ 135,228	$ 149,994	$ 320,000	$ 1,659,990	$ 83,908
Wadarta	**$ 135,228**	**$ 149,994**	**$ 320,000**	**$ 1,659,990**	**$ 83,908**

Shaxda 22aad: Kaalmo Dhaqaale, 2021-2025

Shaxda 22aad waxay soo bandhigaysaa kharashaadka lagu bixiyey maalgelinta lasiiyo shirkadaha yaryar ee ku ganacsada dalka gudihiisa, waxaa lagaa bixiyaa mashaariicda uu maalgaliyo Bangiga Adduunka. Saddex biloodkii koowaad sannadka 2025 waxaa la bixiyey lacag dhan 0.08M, wuxuuna hoos u dhacay 95% marka la barbardhigo kaalmada dhaqaale ee la bixiyey rubaca koowaad ee sannadka 2023. Halka saddex biloodkii koowaad ee sannad maaliyadeedka 2024 ay Dawladu bixisay qadar lacageed oo dhan 1.66M.

DEEQAHA

Nooca Kharashka	Jan-Mar 2021	Jan-Mar 2022	Jan-Mar 2023	Jan-Mar 2024	Jan-Mar 2025
Deeqaha Joogtada ee La Siiyo Hay'adaha Caalamiga ah	357,230	25,843	1,300,000	1,261,268	3,861,367
Deeqaha Joogtada ah ee La Siiyo Qaybaha Kale ee Dowladda	9,265,810	9,909,018	9,822,316	10,666,338	13,621,683
Deeqaha Raasumaalka ah ee Qaybta kale ee Dowladda	0	2,369,407	1,045,617	1,988,276	7,694,006
Wadarta Deeqada	**$9,623,040**	**$12,304,268**	**$12,167,932**	**$13,915,882**	**$25,177,056**
Korork/Naaquska	-80%	28%	-1%	14%	81%

Shaxda 23aad: Deeqaha la bixiyey, 2021-2025

Kharashaadka deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada dalka, Gobolka Banaadir iyo lacagaha la siiyo hay'adaha caalamiga ah ay dawladdu xubinta ka tahay, waxaa la bixiyey $25M oo u dhiganta 13% wadarta kharashaadka la bixiyey rubaca koowaad ee sannadka 2025. Kharashaadka Deeqaha ayaa kor u kacay 81% kharashaadka la bixiyey rubaca koowaad ee sannadka 2025 marka la barbardhigo kharashaadkii la bixiyey rubaca koowaad ee sannadka 2024. Sidoo kale sannadka 2024 wuxuu kordhay 14% marka la barbardhigo deeqaha la bixiyey rubaca koowaad ee sannadka 2023.

Hay'adaha Dawladda	Jan-Mar 2021	Jan-Mar 2022	Jan-Mar 2023	Jan-Mar 2024	Jan-Mar 2025
Bangiga Horumarinta Soomaaliya	138,444	134,154	156,343	204,889	180,108
Rugta Ganacsiga Soomali	138,444	134,154	156,343	204,889	180,108
Dawladd Goboleedka Somaliland	0	9,000	0	0	0
Dawladd Goboleedka Puntland	1,313,750	2,001,152	2,707,980	0	1,181,330
Dawladd Goboleedka Jubbaland	918,688	1,248,902	880,075	1,174,985	2,932,344
Dawladd Goboleedka Koofur-galbeed	858,291	2,409,700	685,216	2,447,121	4,102,290
Dawladd Goboleedka Galmudug	585,117	945,994	793,371	1,416,078	2,151,623
Dowlad Goboleedka Hirshabeelle	1,159,759	918,445	356,618	884,514	2,319,535
Maamulka Gobolka Benadir iyo Dawladda Hoose ee Muqdishu	4,153,317	4,476,923	5,131,986	6,322,138	8,268,351
Wadarta	**$ 9,265,810**	**$ 12,278,424**	**$ 10,867,932**	**$ 12,654,614**	**$ 21,315,689**
	-81%	33%	-11%	16%	68%

Shaxda 24aad: Deeqaha la siiyo Dawlad Goboleedyada, 2021-2025

Deeqaha lasiiyo Dawlad gobleedyada iyo Gobolka Banaadir waxaa loo wareejiyey lacag dhan $21M, waxayna ka badan tahay 68% lacagihii loo wareejiyey rubaca koowaad ee sannadka 2024. Sidoo kale, sannadka 2024 wuxuu kor u kacay 16% marka la barbardhigo deeqihii labixiyey oo ahayd $10M sannadka 2023. Deeqalaha la siiyo dawlad goboleedyada waxay isugu jiraan deeqo laga bixiyo dakhiliga gudaha ee Dawladda iyo kuwo laga bixiyey mashaariicda Bangiga Aduunka uu maalgaliyo.

FAA'IDADA BULSHADA

Nooca Kharashka	Jan-Mar 2021	Jan-Mar 2022	Jan-Mar 2023	Jan-Mar 2024	Jan-Mar 2025
Dheefta Badbaadada Bulshada - Lacag Cadaan ah	-	-	-	-	-
Dheefta Badbaadada Bulshada - Lacag ahayn	-	-	2,982,865	-	-
Gargaarka Bulshadda - Lacag ahaan	-	-	-	-	-
Gargaarka Bulshadda - Lacag ahayn	-	-	-	-	-
Wadarta	**$-**	**$-**	**$2,982,865**	**$-**	**$-**

Shaxda 25aad: Faa'iidada Bulshada, 2021-2025

Shaxda 25aad waxay muujinaysaa kharashaadka lagu bixiyey Faa'iidada Bulshada. Rubaca koowaad ee sannadaha 2024 iyo 2025 lama bixin Kharashaadka faa'iidada bulshada. Waxaa la bixiyey kharash rubca koowaad ee sannadka 2023 waxaana la bixiyey $2.98M oo u dhiganta 3% wadarta kharashaadka Dawladda ee la bixiyey sannadka 2023. Kharashkan waxaa laga bixiyaa mashaariicda Bangiga Adduunka dawladda ugu deeqay, waana lacag caddaan ama wax u dhigma oo lasiiyo barakacayaasha iyo qoysaska nugul ee ku nool dalka gudahiisa.

Kharashaadka kale

	Dhabta-2021	Dhabta-2022	Dhabta-2023	Dhabta-2024	Dhabta-2025
Wareejimaha Kale ee aan Meelna Lagu Qeexin	-	-	-	-	11,728,705
Kharashyada, Khidmadaha, iyo Sheegashooyinka la Xidhiidha Caymiska	-	-	-	-	-
Wadarta Kharashaadka kale	**-**	**-**	**-**	**-**	**$ 11,728,705**

Shaxda 26aad: Kharashaadka Kale

Sida ka muuqato shaxda 26aad, kharashaadka kale waxaa markii ugu horaysay la bixiyey $11.7M, waxaana la siiyey hay'ada caalami oo adeeyo ka fuliyo gudaha dalka.

Soo libsashada Hantida aan maaliyada ahayn (hantida maguurtada ah)

Nooca Kharashka	Jan-Mar 2021	Jan-Mar 2022	Jan-Mar 2023	Jan-Mar 2024	Jan-Mar 2025
Dhismooyinka iyo Qaabdhismeedka	-	166,469	-	-	-
Qalabka iyo Mashiinadda	222,634	280,010	51,791	941,978	13,853,222
Hantida kale ee Maguurtada ah	1,583,492	469,606	952,843	263,938	1,707,350
Nidaamyada Hubka	-	-	-	-	-
Hantida aan Qiimo Dhicin ee an la Taaban Karin	-	-	-	-	-
Wadarta	**$1,806,126**	**$916,084**	**$1,004,634**	**$1,205,916**	**$15,560,572**
% Kororka/naaquska	0%	-49%	10%	20%	1190%

Shaxda 27aad: Hantida aan Maaliyadda ahayn, 2021-2025

Shaxda 27aad waxaa ka muuqda kharashaadka ku baxay soo iibinta hantida maguurtada ah, waxaa lagu bixiyey $15M oo u dhiganta 8% wadarta kharashaadka guud ee la baxiyey rubaca koowaad sanndka 2025. Wuxuuna kordhay 1190% marka la barbardhigo kharashka lagu bixiyey soo iibinta hantida maguurtada ee rubaca koowaad ee sannadka 2023.

Kharashaadka joogtada waxaa laga bixiyey $9.5M oo ah 62% kharashaadka soo iibsashada hanti aan maaliyadda ahayn ee baxay rubaca koowaad ee sannadka 2025, kharashaadka mashaariicda waxaa laga bixiyey $6M oo u dhiganta 38% wadarta kharashaadka ku baxay soo iibinta hantida maguurtada ah ee la bixiyey ruaca koowaad ee sannadka 2025.

Kororka ugu badan wuxu ka yimid soo iibinta qalabka doorashooyinka oo loo soo iibiyey Guddiga Doorashooyinka Qaranka. Waxaa lagu bixiyey 9M oo u dhiganta 58% wadarta kharashka ku baxay soo iibinta hantida aan maaliyadda ahayn ee la bixiyey rubaca koowaad sannad maaliyadeedka 2025.

DIB U BIXINTA DAYAMAHA

Nooca Kharash	Jan-Mar 2021	Jan-Mar 2022	Jan-Mar 2023	Jan-Mar 2024	Jan-Mar 2025
Dib u Bixinta Daymaha	3,856,519	1,526,714	1,717,083	764,339	764,339
Wadara	**$3,856,519**	**$1,526,714**	**$1,717,083**	**$764,339**	**$764,339**

Shaxda 28aad: Dib u bixinta Daymaha, 2021-2025

Shaxda 28aad waxay muujinaysaa kharashaadkii ku baxay dib u bixinta daymaha ee saddex biloodkii koowaad sannadaha 2021 – 2025. Rubaca koowaad ee sanadaha 2024 iyo 2025 waxaa la bixiyey lacagtii ugu yarayd 5tii sano ee lasoo dhaafay.

Isticmaalka Miisaaniyadda Kharashaadka Joogtada ah ee Hay'adaha Dawladda 2025

Code	Faahfaahin	Dhabta Jan-Mar 2025	Ku talagalka Danbe	Ku talagalka Hore	% Fulinta
	Hay'adaha Adeega Maamulka	**55,835,904**	**277,231,471**	**273,973,094**	**20%**
010100	Xafiiska Madaxtooyada	2,684,723	12,417,171	12,529,086	22%
010201	Xafiiska Golaha Shacabka	6,791,711	27,949,571	27,893,681	24%
010202	Xafiiska Aqalka Sare	1,571,976	8,003,196	7,973,196	20%
010300	Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha	2,189,426	11,691,791	10,610,236	19%
010400	Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga	825,039	4,190,468	4,028,603	20%
010401	Safaaradaha	1,399,347	5,399,729	5,381,729	26%
010500	Wasaaradda Maaliyadda	3,980,206	17,082,209	16,661,302	23%
010501	Xafiiska Xisaabiyaha Guud	780,750	3,430,309	3,413,164	23%
010502	Adeega Guud ee Dowladda	15,872,244	121,749,283	125,322,973	13%
010503	Xarunta Warbixinnada Maaliyadeed ee Soomaaliya	201,710	997,837	1,004,452	20%
010600	Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha	599,076	2,796,158	2,757,998	21%
010601	Hey'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya	257,730	1,308,394	1,304,029	20%
010700	Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta	582,432	2,941,385	2,950,880	20%
010701	Hey'adda Qoxootiga iyo Barakacayaasha Qaran	163,515	830,125	843,040	20%
010702	Hey'adda Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadwaynaha	286,475	2,024,895	2,025,660	14%
010703	Hey'adda Maaraynta Masiibooyinka	537,142	8,833,953	13,821,758	6%
010800	Wasaaradda Awqaafta iyo Arrimaha Islaamka	541,133	3,364,862	3,383,537	16%
010900	Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka	502,800	2,442,600	2,409,795	21%
010901	Ciidanka Asluubta	2,604,606	11,429,440	11,429,440	23%
011001	Maxkamdda Sare	535,133	2,720,922	2,727,537	20%
011002	Maxkamadda Gobollka Banaadir	496,030	2,298,874	2,312,104	22%

011003	Maxkamadda Racfaanka	233,342	1,194,399	1,194,399	20%
011005	Guddiga Adeegga Garsoorka	31,548	195,192	195,192	16%
011100	Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud	486,267	2,155,913	2,162,528	23%
011200	Xafiiska Garyaqaanka Guud	134,100	709,415	706,400	19%
011300	Xafiiska Hantidhowka Guud	926,273	4,016,279	4,022,894	23%
012100	Guddiga M. Banaan Ee Xududaha & Federalka	-	-	329,280	#DIV/0!
012200	Guddiga Madax Bannaan Ee Dib-u-Heshiisiinta Qaranka	114,329	496,772	496,772	23%
012300	Guddiga Madax Bannaan Doorashooyinka Qaranka iyo Soodimaha	9,886,403	11,692,175	1,207,560	85%
012500	Guddiga Madax Bannaan Ee Dib-u-Eegista iyo Hirgelinta Dastuurka	221,159	1,033,636	1,033,636	21%
012600	Guddiga Shaqaalaha Rayidka Dowladda	363,281	1,690,399	1,696,114	21%
012700	Guddiga Madax Bannaan Ee La-Dagaalanka Musuqmaasuqa	36,000	144,120	144,120	25%
	Hay'adaha Adeega Amniga	**60,598,235**	**257,123,260**	**257,147,965**	**24%**
020100	Wasaaradda Gaashaandhigga	354,135	3,729,825	3,732,795	9%
020101	Ciidanka Xoogga Soomaaliyeed	39,499,563	163,436,555	163,436,555	24%
020102	Maxkamadda Ciidamadda	756,054	3,740,000	3,740,000	20%
020103	Hay'adda Naafada iyo Agoonta C. Qalabka Sida	15,000	93,000	93,000	16%
020200	Wasaaradda Amniga Gudaha	295,430	1,561,334	1,581,269	19%
020201	Ciidanka Booliska Soomaaliyeed	11,688,411	49,681,986	49,681,986	24%
020202	Hey'adda Nabad Sugidda iyo Sirdoonka	6,695,901	28,466,720	28,466,720	24%
020203	Hey'adda Sodaalka iyo Jinsiyadda	1,293,742	6,413,840	6,415,640	20%
	Hay'adaha Adeega Dhaqaalaha	**8,730,848**	**45,115,262**	**45,127,551**	**19%**
030100	Wasaaradda Tamarta & Kheyraadka Biyaha	375,168	1,644,580	1,662,832	23%
030200	Wasaaradda Batroolka & Macdanta	417,299	2,271,428	2,238,344	18%
030201	Hey'adda Batroolka Soomaaliyeed	207,717	1,082,285	1,080,260	19%
030300	Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka	439,422	1,925,980	1,888,540	23%
030400	Wasaaradda Xanaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa	324,628	1,481,874	1,493,052	22%
030500	Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah	350,515	1,579,130	1,582,320	22%
030501	Hey'adda Cilmi Baarista Baddaha Soomaaliyeed	135,159	606,098	640,748	22%
030502	Mashruuca Horumarinta Xeebaha iyo Kalluumaysiga	14,844	112,776	112,776	13%
030600	Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska	1,034,611	6,296,989	6,319,714	16%
030700	Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknoloojiyada	450,428	1,968,254	1,950,047	23%
030701	Hey'adda Isgaariinta Qaranka	134,920	846,054	859,284	16%
030702	Hey'adda Dhowrista Xoggta	-	162,060	162,060	0%
030800	Wasaaradda Howlaha Guud iyo Guriyaynta	458,976	1,954,420	2,035,480	23%
030900	Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada	524,831	4,441,693	4,237,016	12%
030901	Hay'adda Duulista Hawadda	2,041,597	9,633,494	9,662,284	21%
031000	Wasaaradda Dekedaha iyo Gaadiidka Badda	350,266	2,548,426	2,544,844	14%
031001	Dekadda Xamar	232,800	1,032,200	1,032,200	23%
031100	Wasaaradda Ganacsiga & Warshadaha	636,846	2,588,394	2,683,878	25%
031101	Hey'adda Tayo Dhowrka	308,242	1,462,781	1,478,756	21%
031200	Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada	292,579	1,476,346	1,463,116	20%
	Hay'adaha Adeega Bulshada	**10,862,053**	**51,796,207**	**51,805,063**	**21%**
040100	Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada	848,486	4,474,237	4,408,492	19%

040200	Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare	6,455,150	32,230,575	32,302,575	20%
040201	Jaamacadda Umadda	2,015,621	8,272,680	8,272,680	24%
040202	Akadeemiyadda Cilmiga, Fanka iyo Suuggaanta	298,586	1,286,827	1,313,872	23%
040203	Akadeemiya Goboleedka Afka Soomaaliga	60,773	342,256	342,256	18%
040300	Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada	549,112	2,313,363	2,283,420	24%
040400	Wasaaradda Dhallinyarada & Ciyaaraha	244,317	1,071,069	1,079,448	23%
040500	Wasaaradda Qoyska & Horamarinta Xuquuqul Insaanka	254,108	1,166,919	1,160,304	22%
040501	Hay'addaha Naafadda Qaranka	135,900	638,281	642,016	21%
	Wadarta Kharashaadka Joogtada ah	**$136,027,040**	**$631,266,201**	**$628,053,674**	**22%**

Shaxda 29aad: Isticmaalka Miisaaniyadda Kharashaadka Joogtada ah ee Hay'adaha Dawladda

Isticmaalka Miisaaniyadda Kharashaadka Mashaariicda ee Hay’adaha Dawladda, 2025

Code	Faahfaahin	Dhabta Jan-Mar 2025	Ku talagalka Danbe	Ku talagalka Asalka	% Fulinta
	Hay'adaha Adeega Maamulka	**19,904,415**	**161,361,824**	**164,634,351**	**12%**
010500	Wasaaradda Maaliyadda	13,784,265	108,290,355	111,562,882	13%
010600	Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha	2,441,753	17,255,367	17,255,367	14%
010601	Hey'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya	854,779	4,548,883	4,548,883	19%
010700	Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta	2,823,618	27,780,189	27,780,189	10%
010703	Hey’adda Maaraynta Masiibooyinka	-	3,487,030	3,487,030	0%
	Hay'adaha Adeega Dhaqaalaha	**14,459,528**	**289,506,013**	**289,506,013**	**5%**
030100	Wasaaradda Tamarta & Kheyraadka Biyaha	2,218,871	90,947,806	90,947,806	2%
030300	Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka	7,535,409	55,131,044	55,131,044	14%
030400	Wasaaradda Xanaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa	100,868	12,431,641	12,431,641	1%
030500	Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah	698,970	15,169,900	15,169,900	5%
030700	Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknoloojiyada	410,932	11,786,120	11,786,120	3%
030702	Hey’adda Dhowrista Xoggta	-	1,826,000	1,826,000	0%
030800	Wasaaradda Howlaha Guud iyo Guriyaynta	3,494,479	102,213,503	102,213,503	3%
	Hay'adaha Adeega Bulshada	**16,275,847**	**277,520,289**	**277,520,289**	**6%**
040100	Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada	13,801,280	87,686,128	87,686,128	16%
040200	Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare	1,674,433	68,186,116	68,186,116	2%
040300	Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada	800,135	121,648,045	121,648,045	1%
	Wadarta Kharashaadka Joogtada ah	**$50,639,790**	**$728,388,127**	**$731,660,654**	**7%**

Shaxda 30aad: Isticmaalka Miisaaniyadda Kharashaadka Mashaariicda ee Hay'adaha Dawladda

Muuqaalka Lacag Qabashada iyo Bixinta

Saddex Biloodka koowaad Jan – Maarso (2025-2024)

	Tixraac	Jan – Mar 2025	Jan - Mar 2024	%
		Qabasho & Bixinta	Qabasho & Bixinta	Koror /Naaqus
Lacag Qabashada				
Wadarta Dakhliga Gudaha		**93,890,358**	**91,713,350**	2%
Dakhliga Cashuuraha		**67,990,845**	**65,767,125**	3%
Canshuurta Dakhliga, Faa'iidada	1	16,123,147	8,781,565	84%
Canshuuraha Agabka iyo Adeegga	2	12,286,455	12,493,168	-2%
Canshuuraha Ganacsiga Dibadda	3	37,427,276	42,721,088	-12%
Canshuuraha Kale	4	2,153,966	1,771,303	22%
Dakhliyada Kale	**5**	**25,899,513**	**25,946,225**	**0%**
Wadarta Deeqaha Dibadda		**65,131,268**	**26,698,352**	144%
Deeqaha Laba Dhinacle ah	6	10,287,693	5,641,619	82%
Deeqaha Dhinacyaha Badan	7	54,843,575	21,056,733	160%
Dakhli Hanti la Gaday		**-**	**-**	-
Dakhliga Gadista Hantida	8	-	-	-
Daymaha		-	-	
Daymaha Gudaha	9	-	-	
Wadarta Lacag Qabashada		**159,021,626**	**118,411,702**	**34%**
Lacag Bixinta				
Hawl Fulinta				
Mushaarka Shaqaalaha	10	90,654,612	80,562,507	13%
Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	11	42,373,390	28,121,036	51%
Faa'idada Bulshada	12	-	-	-
Kaalmo Dhaqaale	13	83,908	1,659,990	-95%
Kharashaadka kale	20	11,728,705	-	
Wadarta Kharashaadka Hawl Fulinta		**144,840,616**	**110,343,533**	**31%**
Lacag Wareejin				
Deeqaha Dawlad Goboleedyada	14	21,315,689	12,654,614	68%
Lacag Wareejinada Kale	15	3,861,367	1,261,268	206%
Wadarta Lacagaha la wareejiyey		**25,177,056**	**13,915,882**	**81%**
Qulqulka kaashka ee Maalgashiga				
Soo Ibsasho Hanti Maguurtada ah	16	15,560,572	1,205,916	1190%
Wadart Hantida Maguurtada		**15,560,572**	**1,205,916**	**1190%**
Bixinta Daynta & Dulsaarka				
Dib u Bixin Dayn	17	764,339	764,339	0%
Dulsaarka Daynta la bixiyay	18	324,248	156,205	108%
Wadarta Daymaha & Dulsaarka		**1,088,587**	**920,544**	**18%**
Wadarta Lacagaha la Bixiyay		**186,666,830**	**126,385,875**	48%
Dheeri/(Dhiman) Dhamaadka Sannadka				
Haraaga Kaashka Bilowga sannadka		(27,645,204)	(7,974,173)	247%
Dheeri/(Dhiman) Dhamaadka Sannadka		106,270,139	98,757,409	8%
Haraaga Kaashka Dhamaadka Sannadka	19	**$78,624,935**	**$90,783,236**	**-13%**

Sida ku cad faahfaahinta tirsi 19aad lacag gaarayso US$33,429,433 & US$50,543,780 oo ku jirta muuqaalka haraaga xisaabaadka Dawladda dhammaadka saddex biloodka koowaad ee sannadaha 2025 & 2024 waxa ay gaar tahay mashaariicda dibedda laga maalgaliyo, loomana isticmaali karo ujeedo ka baxsan sida lagula heshiiyey deeq bixiyayaasha, waana lacaga ay xadidan tahay isticmaalkeeda. Intaa wixii ka baxsan Dawladu waxa ay uga faaiidaysan kartaa baahiyaadka jira wakhti kasta oo ay u baahato.

Dawladda Federaalka Soomaaliya

Muuqaalka Isbarbardhig Dhabta iyo Miisaaniyadda

Saddex Biloodka koowaad Jan – Maarso (2025-2024)

	Dhabt 2025 USD$	Kutalagalki ugu danbeeyay USD$	Kutalagalkii Hore USD$	Farqiga Kutalagalka Danbe iyo Dhabta USD$
Lacag Qabashada				
Dakhliga Canshuuraha	67,990,845	295,289,259	295,289,259	(227,298,414)
Dakhliyada kale	25,899,513	135,052,170	135,052,170	(109,152,657)
Deeqaha Laba Dhinacle ah	17,408,128	169,967,500	169,967,500	(152,559,372)
Deeqaha Dhinacya Badan	47,723,140	731,660,654	731,660,654	(683,937,513)
Dakhli Xaraashka Hanti Maguurta	-	-	-	-
Wadarta Lacag Qabashada	**159,021,626**	**1,331,969,583**	**1,331,969,583**	**(1,172,947,957)**
Lacag Bixinta				
Mushaarka Shaqalaha	90,654,612	370,524,825	370,000,625	279,870,213
Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	42,373,390	396,206,315	396,453,106	353,832,925
Dulsaarka Daymaha	324,248	13,800,000	13,800,000	13,475,752
Kaalmo Dhaqaale	83,908	14,620,000	13,280,000	14,536,092
Deeqo la Bixiyey	25,177,056	233,663,975	238,663,975	208,486,919
Faa'idada Bulshada	-	77,000,000	77,000,000	77,000,000
Dib u Bixin Daymaha	11,728,705	64,427,668	68,416,928	52,698,963
Wadarta Lacag Bixinta	**171,106,258**	**1,170,242,783**	**1,177,614,634**	**999,900,864**
Hantida Maguurtada				
Soo Iibsashada Hantida aan Maaliyadda ahayn	15,560,572	189,471,544	182,099,693	173,910,972
Wadarta Hantida Maguurtada	**15,560,572**	**189,471,544**	**182,099,693**	**173,910,972**
Wadarta Kharashaadka	$186,666,830	$1,359,714,328	$1,359,714,328	$1,173,811,836
SAAFIGA QULQULKA LACAGTA	**- 27,645,204**	**- 27,744,745**	**- 27,744,745**	**-**

Xeerarka xisaabeed iyo faahfaahinta la socota xisaab-xirka ee ku qoran laga bilaabo boga 7aad kuna eg bogga 90aad waxa ay qayb muhiim ah ka mid tahay Xisaabxirka sannad maaliyadeedka 2025.

Muuqaalka isbarbardhiga dhabta iyo miisaaniyadda wuxuu is barbardhig ku samaynaa dhabta dakhliiga iyo kharashaadka iyo miisaaniyadda dakhliga iyo kharashaadka ee sannadka 2025.

MACLUUMAAD GUUD IYO XEERAR XISAABEEDKA DAWLADDA

8.1 Xeerarka Xisaabeed

8.1.0 Warbixin Guud

Xarunta ugu weyn ee ay ku shaqayso xiligaan Dawladda Federaalka Soomaaliya waa magaalada Muqdisho oo isla markaana ah magaala madaxda dalka. Hay'ada soo gudbisay warbixintaan waxaa laga heli karaa cinwaankaan hoose ku xasan:

Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dawladda
Dhismaha Wasaarada Maaliyadda
Degmada Shingaani
Muqdisho,
Soomaaliya

Hawlaha loo igmaday Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo hay'adaha hoos yimaada waxaa ka mid ah in muwaadinka Soomaliyeed ka haqab tirto adeegyada dawladeed ee ay ugu baahanyihiin si joogto ah.

Sharciyada maaliyadeed ee lagu maamulay hawlaha la xiriira maaliyadda Dawladda waxaa ka mid ah:-

1. Sharciga Qoondada Miisaaniyada ee 2025
2. Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 2019 iyo Xeernidaamiyihiisa, 2022
3. Sharciga wax Iibsiga Dawladda ee (Procurement Act), 2016

December 2019 Baarlamaanka Dawladda Federaalka Soomaaliya waxa uu ansixiyay Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, sidoo kale Xeer nidaamiyaha Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ayaa isna la ansixiyay 2022. Sharciga cusub ee Maamulka Maaliyadda waxa uu beddeli doonaa Sharcigii hore ee Habraaca Maaliyadda iyo Xisaabaadka Dawladda ee 1961 ee markii danbe 1971 wax looga badalay. Sharcigaan cusub waxana uu sii adkaynayaa baahidii loo qabay in la soo saaro warbixin maaliyadeed ee uu farayay sharcigii hore ee la beddelay. Sidaas daraadeed, waxa uu farayaa in Xisaabxirka loo soo diyaariyo hab waafaqsan xeerarka caalamiga ah ee xisaabaadka Dawladda sida ku cad qodobka 94^{aad} faqradiisa 2^{aad}, halka qodobka 103^{aad} ee Sharciga cusub kusii kordhinaayo faahfaahinada dheeriga ah ee loo baahanyahay in la raaciyo xisaabxirka.

Xeerar Xisaabeedka Dawladda

Xeerarka halkaan ku xusan waxaa loola jeedaa mabaadi'da gaarka ah, waxyaabaha lagu saleeyo aqoonsiga dhacdooyinka maaliyadeed, heshiisyada xisaabeed qawaaniinta maaliyadeed ee ay ku dhaqanto Dawladda Federaalka Soomaaliya marka la diyaarinayo lana soo bandhigayo warbixinnada maaliyadeed ee sannadlaha ah ama rubaclaha ah. Bogaga soo socda waxaa ku qoran xeerarka xisaabeed ee loo cuskaday diyaarinta xisaabxirka iyo warbixinnada maaliyadeed ee la socda. Xeer kasta oo halkaan lagu xuso waa habka saxda ah ee si joogto ah loogu isticmaalo dhacdooyinka maaliyadeed ee dalka. Qaar ka mid ah xeerarkaas hoos ayay ku xusan yihiin.

A) Xeerarka lagu saleeyay Diyaarinta Xisaabxirka

Xisaabxirka waxaa uu waafaqsan yahay shuruucda soo socota;

- Sharciga Maamulka Maaliyada Dalka ee 2019, iyo Xeernidaamiyihiisa, 2022
- Xeerarka Xisaabeed ee Caalamiga ah ee (IPSAS) gaar ahaan Halbeegga Xisaabaadka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda, Lacagaha Caddaanka ah (Cash Basis IPSAS, 2017).

Si waafaqsan tuduca 1aad iyo qodobka 43aad faqradiisa 2aad ee Sharciga PFM-ka, Xisaabxirkani waxa loo soo diyaariyay hab waafaqsan dhammaan Xeerarka Xisaabeed ee Caalamiga ah ee la isla garanaayo ee loo yaqaano International Public Sector Accounting Standards ama (IPSAS), gaar ahaan Halbeegga Xisaabaadka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda, Lacagaha Caddaanka ah (Cash Basis IPSAS, 2017) ee uu soo saaray Dallada Caalamiga ah ee Dejinta Xeerarka xisaabeed ee Dawladaha ee (IPSASB) ee hoos yimaada Hay'adda Caalamiga ah ee Xisaabaadka ee (IFAC) sida ku cad qodobka faahfaahinta xeerarka xisaabeed ee hoos ku xusan.

Marka la dhaqangeliyo shuruucda nidaamka ku xisaabtanka lacagaha caddaanka ah keliya ee IPSAS warbixinada ugu muhiimsan waxaa ka mid ah kuwan soo socda;

- Muuqaalka Dakhliga iyo Kharashaadka
- Muuqaalka isbarbardhiga Kutalagalka miisaaniyadda iyo Natiijada dhabta ah;
- Xeerarka xisaabeed iyo faahfaahinada la socda;

Warbixinnada aasaasiga ah ee kor ku xusan waxaa lala soo gudbiyay faahfaahino iyo macluumaad kale, oo muhiim tahay in la shaaciyo sida uu qabo Xeernidaamiyaha Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 2022 qodobkiisa 103aad faqrada 2aad waxaana ka mid ah macluumaadkaas:

- Muuqaalka Maaliyadeed ee Dawladda (Balance sheet)
- Warbixinta Dakhliga iyo Kharashaadka aan ku jirin Miisaaniyadda Dawladda;
- Warbixinta Deymaha kharashaadka;
- Warbixinta Deymaha Dibedda
- Warbixinta Qalabka iyo Hantida Maguurtada ah

b) Mabda'a sii joogtaynta hawlaha Dawladda (Going concern)

Xisaabxirka Dawladda waxaa loo diyaariyay hab waafaqsan mabda'a sii joogtaynta hawlaha Dawladda. Dhammaan xeerar xisaabeedka Dawladda waxaa loo dhaqan galiyay si joogto ah intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedka.

c) Hay'ada warbixinta soo gudbisay

Sida uu qabo Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 qodobkiisa 45aad faqradiisa 1aad ee awooda u siinaya Xisaabiyaha Guud ee Dawladdu in uu soo diyaariyo xisaabxirka. Haddaba Xisaabxirkan waxaa soo diyaariyay soona gudbiyey Xafiiska Xisaabiyaha guud ee Dawladda.

Si waafaqsan qodobka 1.4.8 ee Halbeegga Xisaabeedka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda ee lacagaha Caddaanka ah (cash basis IPSAS, 2017), Xisaabxirkani waxaa lagu soo gudbiyay dhammaan dhacdooyinka maaliyadeed ee hay'adaha Dawladda Federaalka Soomaaliya ee ku jira miisaaniyadda Dawladda 2025. Liiska hoose waxaa ku xusan dhammaan hay'adaha Dawladda ee ku jiray qoondada miisaaniyadda ee xisaabxirkaani khuseeyo.

Code	Faahfaahin
	Hay'adaha Adeega Maamulka
010100	Xafiiska Madaxtooyada
010201	Xafiiska Golaha Shacabka
010202	Xafiiska Aqalka Sare
010300	Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha
010400	Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga
010401	Safaaradaha
010500	Wasaaradda Maaliyadda
010501	Xafiiska Xisaabiyaha Guud
010502	Adeega Guud ee Dowladda
010503	Xarunta Warbixinnada Maaliyadeed ee Soomaaliya
010600	Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha
010601	Hey'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya
010700	Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta
010701	Hey'adda Qoxootiga iyo Barakacayaasha Qaran
010702	Hey'adda Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadwaynaha
010703	Hey'adda Maaraynta Masiibooyinka
010800	Wasaaradda Awqaafta iyo Arrimaha Islaamka
010900	Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka
010901	Ciidanka Asluubta
011001	Maxkamdda Sare
011002	Maxkamadda Gobollka Banaadir
011003	Maxkamadda Racfaanka
011005	Guddiga Adeegga Garsoorka
011100	Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud
011200	Xafiiska Garyaqaanka Guud
011300	Xafiiska Hantidhowka Guud
012200	Guddiga Madax Bannaan Ee Dib-u-Heshiisiinta Qaranka
012300	Guddiga Madax Bannaan Doorashooyinka Qaranka iyo Soodimaha
012500	Guddiga Madax Bannaan Ee Dib-u-Eegista iyo Hirgelinta Dastuurka
012600	Guddiga Shaqaalaha Rayidka Dowladda
012700	Guddiga Madax Bannaan Ee La-Dagaalanka Musuqmaasuqa
	Hay'adaha Adeega Amniga
020100	Wasaaradda Gaashaandhigga
020101	Ciidanka Xoogga Soomaaliyeed
020102	Maxkamadda Ciidamadda
020103	Hay'adda Naafada iyo Agoonta C. Qalabka Sida
020200	Wasaaradda Amniga Gudaha
020201	Ciidanka Booliska Soomaaliyeed
020202	Hey'adda Nabad Sugidda iyo Sirdoonka
020203	Hey'adda Sodaalka iyo Jinsiyadda
	Hay'adaha Adeega Dhaqaalaha

030100	Wasaaradda Tamarta & Kheyraadka Biyaha
030200	Wasaaradda Batroolka & Macdanta
030201	Hey'adda Batroolka Soomaaliyeed
030300	Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka
030400	Wasaaradda Xanaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa
030500	Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah
030501	Hey'adda Cilmi Baarista Baddaha Soomaaliyeed
030502	Mashruuca Horumarinta Xeebaha iyo Kalluumaysiga
030600	Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska
030700	Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknoloojiyada
030701	Hey'adda Isgaariinta Qaranka
030702	Hey'adda Dhowrista Xoggta
030800	Wasaaradda Howlaha Guud iyo Guriyaynta
030900	Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada
030901	Hay'adda Duulista Hawadda
031000	Wasaaradda Dekedaha iyo Gaadiidka Badda
031001	Dekadda Xamar
031100	Wasaaradda Ganacsiga & Warshadaha
031101	Hey'adda Tayo Dhowrka
031200	Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada
	Hay'adaha Adeega Bulshada
040100	Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada
040200	Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare
040201	Jaamacadda Umadda
040202	Akadeemiyadda Cilmiga, Fanka iyo Suuggaanta
040203	Akadeemiya Goboleedka Afka Soomaaliga
040300	Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada
040400	Wasaaradda Dhallinyarada & Ciyaaraha
040500	Wasaaradda Qoyska & Horamarinta Xuquuqul Insaanka
040501	Hay'addaha Naafadda Qaranka

d) LACAGTA LAGU SALEEYEY XISAABXIRKA

Lacagta sida toos loogu diiwaangaliyo dhacdooyinka maaliyadeed ee Dawladda waa lacagta doolarka maraykanka (USD). Waxaa loo isticmaalaa soo aruurinta dakhliga Dawladda sidoo kale waxaa lagu bixiyaa kharashaadka Dawladda. Lacagaha lagu qabtay Shilin Soomaaliga waxaa loo bedalaa (sarifaa) Doolarka Maraykanka, maadaama miisaaniyaddu ay ku salaysantahay Dollarka Maraykanka.

e) Sannad Maaliyadeedka

Sannad Maaliyadeedka Dawladda Federaalka Soomaaliya waxa uu ka bilowdaa 1da Janaayo waxa uu ku egyahay 31da December. Hadaba, waxa jira xisaab xiro dhax-taal u ah xisaab xirka guud ee sannadka sida Xeerka Guud Maaraynta Maaliyada 2019 & Xeer nidaamiyaha maaraynta maaliyada ku cad sida Billaha & Saddex biloodka. Xisaab xirkan waxa uu soo bandhigayaa saddex biloodkii koowaad ee sannad maaliyadeedka 2025 kuna eeg Maarso 31da sidoo kale waxa uu is bar bar dhig ku samaynayaa saddex biloodkii koowaadka ee sannad maaliyadeedka 2024.

f) Aqoonsiga Dakhliga

Dakhliga waxa uu ka kooban yahay dhammaan lacagaha soo gala Dawladda Federaalka Soomaaliya intii lagu guda jiray Saddex biloodka koowaad sannad maaliyadeedka 2025 & 2024, waxa ayna u sii kala baxaan, Dakhliga Cashuuraha, Dakhliyada kale iyo Deeqaha Dibedda ka yimaadda. Dakhliyadaas waxa loo aqoonsadaa dakhli ahaan markii lacagahaas dhab ahaan ugu soo gasho Khasnada Dawladda.

1. <u>Dakhliga Cashuuraha</u>

Dakhliga Canshuuraha waxaa lagu diiwaangaliyaa canshuuraha laga qaaday dadwaynaha, waxayna ka kooban tahay: Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidada, Canshuurta Agabka iyo Adeega, Canshuurta Furadada iyo canshuuraha kale. Dakhliga Canshuuraha waxaa loo aqoonsadaa dakhliga marka lagu soo xareeyo Khasnadda Dhexe Dawladda (TSA).

2. <u>Dakhliyada Kale</u>

Waa dakhliyada laga helo khidmadaha Dawladdu u siiso dadwaynaha ee aan canshuurta ahayn, waxaana dakhli ahaan loo aqoonsadaa markii uu dhab ahaan usoo xeroodo. Waxaa ka mid ah khidmadaha; Bixinta Dalkugalka, Baasaboorada, khidmadaha laga qaado Diyaaradaha Mara Hawada Soomaaliya, iyo Khidmada Dekadda iyo Garoonka Diyaaradaha.

3. <u>Deeqaha Dibedda</u>

Dakhligaan waxa uu ku cad yahay heshiis ay wada galeen deeq bixiyayaasha iyo Dawladda Soomaliya ujeedka loo isticmaali doono dakhligaan ama deeq maaliyadeedka ee dawladdu ka hesho hay'ado iyo wadamo shisheeye oo ah mid dhinacya badan ah ama mid laba dhinacle ah. Dakhligaan waxaa la aqoonsadaa keliya markii uu soo galo Khasnada Dhexe Dawladda.

4. Deymaha

Daymaha oo lagu soo gudbiyo si waafaqsan Halbeegga Xisaabeedka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda **ee lacagaha Caddaanka ah (cash basis IPSAS, 2017)**. Waxaana lagu faahfaahiyey qaybaha daymaha ee lagu leehaya dawladda. Daynta mudada fog iyo daymaha mudada gaaban ay soo qaadatay dawladda. Daymaha waxay ka mid yihiin lacagaha cadaanka ah ee la qabtay, waxaana la aqoon saday kadib marka ku dhacday Khasannadda Dhexe ee Dawladda.

5. Aqoonsiga Kharashaadka

Kharashaadku waa lacagta ay bixiso dawladdu ama jiho kale ka bixiso Dawladda. Sidaas darteed kharashka waxaa la aqoonsan karaa laguna soo gudbin karaa xisaabxirka doowladda markii si dhab ah lacagtu uga baxdo khasnada Dawladda ee (TSA).

6. <u>Mushaarka Shaqaalaha</u>

